**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**AQALKA SARE**

# XEER-HOOSAADKA AQALKA SARE

## NUQULKA 2-AAD

**22 JUUN 2019**

# DHAQAN-GELINTA WAX KA BEDDELKA NUQULKII KOWAAD EE XEER-HOOSAADKA GOLAHA AQALKA SARE EE B.F.S.

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 29 | 29 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 22[ka] Juun 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | Taariikh: 22[ka] Juun 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | Taariikh: 22[ka] Juun 2019 |

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

# Tusmo

**CUTUBKA 1-AAD .......................................................................................................................... ........4**

QODOBKA 1-AAD: GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ........................................................................................ 4
QODOBKA 2-AAD .......................................................................................................... 4
AWOODAHA GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA.................................................................................................... 4
QODOBKA 3-AAD: DHAARTA XUBNAHA GOLAHA ........................................................ 5
QODOBKA 4-AAD: GUDOOMIYAHA KU MEEL GAARKA AH EE GOLAHA.......................... 6

**CUTUBKA 2-AAD: ISUGU YEERIDDA XUBNAHA IYO DHISIDA GUDDOONKA AQALKA SARE. 6**

QODOBKA 5-AAD QAABKA LOO DOORANAYO GUDDOOMIYAHA GOLAHA IYO LABADIISA KU XIGEEN ............................................................................................................ 6

**CUTUBKA 3-AAD: GUDDOONKA, XAFIISKA HABDHOWRKA IYO GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA .................................................................................................................. 7**

QODOBKA 6-AAD: GUDDOONKA, GUDDIGA JOOGTADA IYO XAFIISKA HABDHOWRKA ............. 7
QODOBKA 7-AAD: XILKA GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE ............................................... 8
QODOBKA 8-AAD: AWOOADAHA GUDOOMIYAHA XILIGA KALFADHIGA................................ 8
QODOBKA 9-AAD: XILKA GUDOOMIYE KU XIGEENADA GOLAHA....................................... 8
QODOBKA 10-AAD: XIL WAAYIDDA GUDOOMIYAHA GOLAHA IYO LABADIISA KU XIGEEN. ......... 9
QODOBKA 11-AAD: XILKA HAB DHOWRAHA GOLAHA IYO KU XIGEENKIISA. ....................... 10
QODOBKA 12-AAD: GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA. ............................................. 10
QODOBKA 13-AAD: XILKA IYO WAAJIBAADKA XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA AQALKA SARE.................................................................................................................. 11

**CUTUBKA 4- AAD: XUBANAHA GOLAHA AQALKA SARE.............................................. 12**

QODOBKA 14-AAD XILKA XUBNAHA AQALKA SARE..................................................... 12
QODOBKA 15-AAD: XUQUUQDA XUBNAHA GOLAHA..................................................... 12
QODOBKA 16-AAD: XASAANADDA XUBNAHA AQALKA .................................................. 13
QODOBKA 17-AAD : XAADIRIDA FADHIYADA GOLAHA.................................................. 13
QODOBKA 18-AAD: LABBISKA IYO HEYBADDA XUBNAHA AQALKA SARE ......................... 14
QODOBKA 19-AAD: WAAYIDDA XUBINIMADA AQALKA SARE ......................................... 14

**CUTUBKA 5-AAD: MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA....... 15**

QODOBOKA 20-AAD DOORASHADA MADAXWEYNAHA ................................................ 15
*Qeybta Koowaad................................................................................ 15*
*Qeybta Labaad: Hanaanka Codeynta....................................................... 16*
*Qaybta Sedaxaad - Tirinta Codka: ......................................................... 17*
*Qaybta Afaraad – Keydinta Dokumentiga Doorashada ................................... 18*
QODOBKA 21-AAD: DHAARINTA MADAXWEYNAHA ....................................................... 18
QODOBKA 22-AAD: EEDEYNTA IYO XIL KA QAADISTA .................................................. 18

**CUTUBKA 6-AAD: KALFADHIYADA IYO FADHIYADA AQALKA SARE ................................ 18**

QODOBKA 23-AAD: KALFADHIYADA IYO FADHIYADA AQALKA SARE................................... 18
QODOBKA 24-AAD: KALFADHIYADA AAN CAADIGA AHEYN EE GOLAHA ............................. 19
QODOBKA 25-AAD: AJENDAHA...................................................................................... 19
QODOBKA 26: SIDA AY ISUGU XIGAAN HAWLAHA FADHIYADA GOLAHA:.......................... 19
QODOBKA 27-AAD: GUNTANKA (QUORUM) .................................................................. 20
QODOBKA 28AAD: NOOCYADA CODEYNTA.................................................................... 20
QODOBKA 29-AAD: HABKA DOODA IYO ANSHAXA XUBNAHA GOLAHA:.......................... 21
QODOBKA 30-AAD: HAB DHAQANKA XUBNAHA XILIGA FADHIGA ................................. 22
QODOBKA 31-AAD: HADAL JEEDIN ............................................................................. 23
QODOBKA 32-AAD: DHEXGAL TOOSINEED (POINT OF ORDER) ...................................... 23
QODOBKA 33-AAD: XAQA AY XUBINTA U LEEDAHAY JAWAAB CELIN............................. 24

QODOBKA 34-AAD: KA DOODISTA HINDISE SHARCIYEED IYO SOO JEDINTA SI GO'AAN LOOGA GAARO: ........ 24
QODOBKA 35-AAD: HADAL-JEEDINTA WASIIRRADA ........ 26
QODOBKA 36: NIDAAMKA FADHIGA GOLAHA ........ 26
QODOBKA 37-AAD: DAAH FURNAANTA FADHIYADA GOLAHA ........ 27
QODOBKA 38-AAD: AMNIGA AQALKA SARE ........ 27
QODOBKA 39-AAD: KEYDINTA & XAFIDAADA HADAL QORAALKA FADHIYADA GOLAHA ........ 28
QODOBKA 40-AAD: XUSHMADA ISTAAGA IYO FADHIGA GOLAHA ........ 29

**CUTUBKA 7-AAD: HABRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA ........ 29**

QODOBKA 41-AAD: CURINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ........ 29
QODOBKA 42-AAD: SOO BANDHIGIDA SHURUUC DEG-DEG AH ........ 29
QODOBKA 43AAD: SOO BANDHIGGIDA IYO AKHRINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ........ 29
QODOBKA 44-AAD: SADDEX JEER AKHRINTA HINDISE SHARCIYEED ........ 30
QODOBKA 45-AAD: U-GUDBINTA HINDISE SHARCIYEEDKA GUDDIGA U-XIL-SAARAAN ........ 30
QODOBKA 46-AAD: SOO-CELINTA WARBIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA EE HEERKA LABAAD. ........ 31
QODOBKA 47-AAD: WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE ........ 31
QODOBKA 48-AAD: HABKA DOODA WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE SHARCIYEED ........ 32
QODOBKA 49-AAD: SOO-JEEDINTA GABAGABADA HEERKA WARBIXINTA ........ 32
QODOBKA 50-AAD: AKHRINTA SADEXAAD EE DOODA AMA WAX-KA-BEDDELID KA DIB ........ 32
QODOBKA 51-AAD: HUBINTA HIDISE-SHARCIYEEDKA ........ 33
QODOBKA 52-AAD HINDISE SHARCIYEED SUGAYA SAXEEXA ........ 33
QODOBKA 53-AAD: HINDISE SHARCIYEEDKA LA DIIDAY ........ 33
QODOBKA 54-AAD : FAAFINTA IYO XAFIDAADA SHARCIYADA ........ 33
QODOBKA 55-AAD: DURID SHARCI ........ 33
QODOBKA 56-AAD: NIDAAMKA HABRAACA ISU GUDBINTA ........ 34
QODOBKA 57-AAD: GUDDIYADA WADAJIRKA AH ........ 34
QODOBKA 58-AAD: DOODA WARBIXINTA GUDDIGA WADAJIRKA ........ 34
QODOBKA 59-AAD: KULAMADA WADAJIRKA AH EE LABADA GOLE ........ 35
QODOBKA 60-AAD: WAX KA BEDDALKA DASTUURKA ........ 36
CUTUBKA 8-AAD: GUDDIYADA ........ 37
QODOBKA 61-AAD:XEERARKA GUUD EE GUDDIYADA ........ 37
QODOBKA 62-AAD: WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIYADA GOLAHA ........ 37
QODOBKA 63-AAD: GUDDOONKA GUDDIYADA ........ 38
QODOBKA 64-AAD: KULAMMADA GUDDIYADA ........ 38
QODOBKA 65-AAD: OGEYSIINTA SHIRARKA CAADIGA AH ........ 39
QODOBKA 66-AAD: KULAMADA KHAASKA AH IYO KUWA GUUD ........ 39
QODOBKA 67-AAD: AJENDAHA ........ 39
QODOBKA 68-AAD: SOO XAADIRISTA KULAMADA GUDDIGA. ........ 40
QODOBKA 69-AAD: HABKA KULAMADA GUDDIYADA ........ 40
QODOBKA 70-AAD: GUNTANKA SHIRKA GUDDIGU KU ANSIXI KARO. ........ 41
QODOBKA 71-AAD: CODEYNTA ........ 41
QODOBKA 72-AAD: DHAGEYSIGA DADWEYNAHA ........ 41
QODOBKA 73-AAD: DIB U EEGISTA IYO KA WARBIXINTA ........ 42
QODOBKA 74-AAD: XOG RAADINTA GUDDIGA ........ 43
QODOBKA 75-AAD: BAARITAANNADA UU SAMEEYO GUDDIGU ........ 43
QODOBKA 76-AAD: WARBIXINTA GUDDIGA EE ARRIMAHA LA BAARAY ........ 43
QODOBKA 77-AAD: GUDDI HOOSAADYADA ........ 43
QODOBKA 78-AAD: QORSHEYAASHA SHAQO IYO QOONDEYNTA MIISAANIYADDA GUDDIGA ... 44
QODOBKA 79-AAD: SHAQAALAHA GUDDIYADA ........ 45
QODOBKA 80-AAD: QORAALLADA GUDDIGA ........ 45
QODOBKA 81-AAD:GUDDIYADA AQALKA SARE ........ 46

**CUTUBKA 9-AAD: KORMEERIDDA XUKUUMADA ........ 53**

QODOBKA 82-AAD: U YEERIDDA RA'ISUL WASAARAHA IYO GOLAHA WASIIRRADA. ........ 53
QODOBKA 83-AAD: SU'AALO XUKUUMADDA LAGU WAYDIINAAYO JAWAAB ORAAH AH & QORAAL. ........ 53
QODOBKA 84-AAD: SU'AASHA XUKUUMADDA LOOGA ........ 54

QODOBKA 85-AAD: JOOGTAYNTA KORMEERKA AY ........ 55

**CUTUBKA 10-AAD: QODOBO ISKUJIR AH (MISCELLANEOUS) ........ 55**

QODOBKA 86-AAD: GUDDIYADDA MADAXBANNAAN ........ 55
QODOBKA 87-AAD: CODSI WADAREED QORAAL AH (PETITION) ........ 56
QODOBKA 88-AAD: SOO BANDHIGIDDA QORAALADA (LAYING OF PAPERS) ........ 56
QODOBKA 89-AAD: SOO BANDHIGADDA WAR BIXINTA DIBADDA EE WUFUUDDA BAARLAMAANKA. ........ 56
QODOBKA 90-AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALAD DEG DEG AH. ........ 57
QODOBKA 91-AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALAD DAGAAL. ........ 57
QODOBKA 92-AAD: MAAMUUSKA MADAXWEYNAHA MARKI UU GOLAHA JOOGO. ........ 57
QODOBKA 93: REEBANAANTA HOOS U DHIGISTA IYO XADDIDAADA AWOODDA XEER-HOOSAADKA GOLAHA ........ 58
QODOBKA 94-AAD: XEER HOOSAADKA AQALKA SARE ........ 58
QODOBKA 95: XIL WAREEJINTA XAFIISKA GUDDOOMIYAHA IYO ARRIMIHA LA XIRIIRA. ........ 58
QODOBKA 96AAD: MAAMULKA GOLAHA AQALKA SARE ........ 60
QODOBKA 97-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA AQALKA SARE ........ 60
QODOBKA 98: LAALIS ........ 60
JADWALKA (A): DHAAR ........ 60
JADWALKA (C): WARQADA SOO JEEDINTA ........ 61
JADWALKA (D): QORAALKA CADDAYNTA MURASHAXA ........ 62
JADWALKA (E): WARQADDA QABASHADA (RECEIPT) SOO JEEDINTA ........ 62
(WAXAA LA SIINAYAA QOFKA SOO GUDBIYA WARQADA SOO JEEDINTA) ........ 62
JADWALKA (F): GO'AAN KA CELINTA WARQADA SOO JEEDINTA ........ 63
JADWALKA (G): WARQADA CODAYNTA ........ 63

## CUTUBKA 1-AAD

## QODOBKA 1-AAD: GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

1. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa matalaha Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuuna ka mid yahay labada gole ee leh awoodda u sarreysa Sharci dejinta dalka.
2. Golaha Aqalka Sare wuxuu ka kooban yahay 54 xubnood sida ku xusan qodobka 72aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Afafka rasmiga ah ee Golaha Aqalka Sare waa: Af-Soomaali (Maay iyo Maxaatiri) Afka Carabigu waa Afka labaad sida ku xusan Qodobka 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
4. Xarunta Goluhu waa Magaalo Madaxda Dalka ee Muqdisho.
5. Golaha Aqalka Sare iyo guddiyadiisu waxay awood u leeyihiin in qaar ka mid ah fadhiyadooda ay ku qabsan karaan meel ka baxsan xaruntooda hadday sidaas go'aansadaan.
6. Muddada jiritaanka Goluhu waa (4) afar sano oo ka bilaabanaysa maalinta la dhaariyay xubnaha Aqalka Sare (27.12.2016).

## QODOBKA 2-AAD

## AWOODAHA GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Awoodaha Golaha Aqalka Sare Waxaa ka mid ah:**

1. Ka qayb qaadashada wax ka beddelka Dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka.
2. Ansixinta, wax ka beddelidda iyo diidmada Sharciyada la horkeeno golaha si waafaqsan qodobbada 82aad & 83aad ee Dastuurka.
3. Curinta Hindise Sharciyeedyada si waafaqsan qodobka 80aad faqraddiisa 2aad ee Dastuurka.
4. Golaha Aqalka Sare ee BFS waa inuu sanad kasta yeeshaa laba Kalfadhi oo caadi ah, ugu yaraan Kalfadhigiiba socdo afar bilood sida uu qabo qodobka 74aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka.
5. Golaha Aqalka Sare waa in ay Sameyntaan Xeer-hoosaad sida uu dhigayo qodobka 75aad ee Dastuurka farqadiisa 1aad.
6. Golaha Aqalka Sare ee BFS wuxuu isu qaybinayaa Guddiyo u kala xilsaaran hawlihiisa sida uu dhigayo qodobka 75aad farqadda 2aad.
7. Golaha Aqalka Sare BFS marka la hor keeno Sharci qabyo ah wuxuu u gudbinayaa Guddiga u xilsaaran arrimahaas.
8. Doorashada Guddoomiyaha Aqalka Sare, Ku xigeenadiisa iyo xil ka qaadistooda.
9. Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
10. Xil ka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Sida ku xusan qodobka 92aad ee Dastuurka KMG ah.

11. La xisaabtanka iyo u kuurgelidda Hay'adaha heer Federaal si loo hubiyo habsami u fulinta Sharciyada dalka.
12. La xisaabtanka, u kuurgelidda iyo habsami u fulinta Shuruucda dalka ee Hay'adaha hoos yimaada Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.
13. La xisaabtanka Madaxweynayaasha iyo xubanaha golayaasha ee Maamul Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.
14. Dhisidda guddiyo shaqo oo joogto ah ee u kuurgala, ilaaliya, baarana habsami u socodka hawlaha dawladda si waafaqsan Shuruucda dalka.
15. U yeeridda Ra'iisul Wasaaraha iyo xubnaha golaha Wasiirrada si waafaqsan qodobka 77aad farqaddiisa 2aad ee Dastuurka.
16. U kuurgelidda dhaqangelinta Dastuurka sida ku xusan Cutubka 15aad ee Dastuurka.
17. Ka qayb qaadashada nidaamka lagu magacaabayo xubnaha soo socda ee Hay'adaha dawladda si waafaqsan Dastuurka:

b. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka.
t. Guddoomiyaha iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuuriga ah.
j. Xubnaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.
x. Xubnaha Guddiga Xudduudaha iyo Federaalaynta Dalka.
kh. Xubnaha Guddiga Xallinta Khilaafaadka

18. Sameynta iyo wax ka beddelka Xeer -hoosaadka Aqalka Sare.
19. Ansixinta ama diidmada Heshiisyada Caalamiga ah ee ay Xukuumaddu la gasho Dawlado, Hay'ado Caalami ah ama dhinacyo kale.
20. Ka qayb qaadashada habraaca ku dhawaaqidda xaalad dagaal si waafaqsan Dastuurka KMG.
21. Eegidda Sharciyada loo igmaday si waafaqsan qodobada 82aad iyo 83aad ee Dastuurka JFS.
22. Hirgelinta muhiimadaha kale ee uu oggolaaday Dastuurku si loo hubiyo dhaqan gelin haboon iyo dib- u -eegid Dastuur.
23. Ka qayb qaadashada habraaca ku dhawaaqidda xaalad deg deg ah si waafaqsan Dastuurka dalka.
24. Awoodaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa ka mid ah xilka Xeer dejinta ay wadaagaan labada gole sida uu tilmaamayo qodobka 57aad ee Dastuurka.
25. Aqalka Sare waxaa uu sameysanayaa isla markaana ansixinayaa soo jeedin Miisaaniyadiisa sanadlaha ah ka hor inta aanay ka mid noqon Miisaaniyadd Sanadeedka Qaranka.
26. Ka qeyb qaadashada Ansixinta Miisaaniyadda Qaranka.

## QODOBKA 3-AAD: DHAARTA XUBNAHA GOLAHA

### Dhaarta xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Soomaaliya ka hor inta uusan/ inta aysan qaban xilka wuxuu marayaa /maraysaa dhaarta hoos ku qoran:

***"WAXAAN KU DHAARANAYAA MAGACA ILAAHAY IN AAN XILKAYGA U GUTO SI DAACAD AH OO AY KU JIRTO DANTA DALKA, DADKA IYO DIINTA DHOWRANA DASTUURKA IYO SHURUUCDA KALE EE DALKA U YAAL"***

## QODOBKA 4-AAD: GUDOOMIYAHA KU MEEL GAARKA AH EE GOLAHA

Fadhiga ugu horeeya ee uu yeelanyo Golaha Aqalka Sare, inta laga dooranaayo Gudoomiyaha Aqalka Sare iyo labadiisa ku xigeen ee rasmiga ah, waxaa si ku meel gaar ah u sii gudoominaya Sanatorka ugu da'da weyn ee Xubnaha Aqalka Sare haddii uusan aheyn musharax.

## CUTUBKA 2-AAD: ISUGU YEERIDDA XUBNAHA IYO DHISIDA GUDDOONKA AQALKA SARE.

## QODOBKA 5-AAD QAABKA LOO DOORANAYO GUDDOOMIYAHA GOLAHA IYO LABADIISA KU XIGEEN

1. Gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxaa cod qarsoodi ah oo aqlabiyad ah ku dooranaya xubnaha Aqalka Sare.
2. Marka ay banaanaato jegada Guddoomiyaha :
   b. Xilka Guddoomiyaha waxaa sii wadaaya ku xigeenka 1-aad , haddii uu Gudoomiye ku xigeenka 1-aad howl u boxo ama Xil gudasho la'aan ku timaado waxaa xilka Guddoomiyaha sii wadaaya Guddoomiye ku xigeenka 2-aad.
   t. Doorashada Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BJFS waa in ay ku dhacdaa 15 cisho Gudahood haddii Kalfadhigu furanyahay.
   j. Haddii Kalfadhigu xiranyahay fadhiga ugu horeya ee kalfadhiga xiga ayaa lagu dooranayaa Guddoomiyaha
3. Musharaxiinta doonaysa in loo doorto xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeen, waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha Aqalka Sare.
4. Musharax kasta waa in uu soo gudbiyaa qoraal muujinaya Rabitaankiisa, oo ay la socdaan labo sawir iyo taariikh nololeedkiisa/nololeedkeeda.(CV)
5. Musharax kasta wuxuu qoraalkiisa kusoo qeexayaa jagada uu u tartamayo haddii ay tahay tan Guddoomiyaha ama tan ku xigeenada (1-& 2aad)
6. Xubin kasta oo Golaha Aqalka Sare ka tirsan (Senator) warqada uu ku soo codeeyo wuxuu ku ridayaa sanduuq marka hore faaruq ah, dushana ka jeexan gudihiisuna uu muuqdo.
7. Guddoomiyaha iyo ku xigeenada Aqalka Sare ee BJFS waxaa lagu dooranayaa xilkana looga qaadayaa sida ku xusan qodobka 73aad ee Dastuurka oo lala akhriyay qodobka 65aad ee Dastuurka oo qeexaya habka loo dooranayo xilkana looga qaadayo Guddoomiyaha iyo Ku xigeenadiisa.
8. Codeyntu waxay noqoneysaa seddex (3) wareeg.
9. Wareega koowaad musharaxii codad aqlabiyad tirada guud Xubnaha Golaha Aqalka Sare ayaa ku guuleysanaayo doorashada sida ku xusan qodobka 65 aad faqradiisa 4-aad ee Dastuurka. Haddii la waayo musharaxii hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareeg labaad.

10. Wareega labaad waxaa ka qeyb galaaya afarta musharax ee hela tirada codadka ugu badan wareega Kowaad. Haddii ay jiraan musharaxiin helay codad isla eg oo bar bar dhac ah, Waxay ka wada qeyb galayaan wareega labaad, oo tirada tartamayaasha ayaa kordheysa. Musharaxii ku guuleysta codadka aqlabiyad tirada guud ee xubnaha Aqalka Sare ayaa ku guuleysanaya doorashada sida ku xusan Qodobka 65 aad faqradiisa 4-aad ee Dastuurka haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareeg seddexaad.
11. Wareegga seddexaad waxaa ka qeyb galaya labada musharax ee ugu codadka badan wareega labaad. Haddii uu jiro musharax saddexaad oo helay tiro la siman mid ka mid ah labada Musharax ee isku soo haray, wuxuu isagana/ iyadana ka qeyb galayaa/ka qeyb galaysaa wareege saddexaad waxaana ku guuleysanaya musharaxii hela cod hal dheeri ah ee tirade xubnaha codeeyey.
12. Haddii ay dhacdo wareega koowaad ka dib ay isku soo haraan labo musharax oo keliya, sababtuna ay tahay tanaasul ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiinta kale Waxaana si toos ah loogu gudbayaa wareega seddexaad sida ku xusan xarafka (C) ee isla Qodobkaan, waxaana markaa meesha ka baxaaya wareegii labaad ee ku xusnaa xarafka (B) ee isla qodobkaan labada musharax ee isku soo haray waxay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha Codeeyey, marka ay codeyntu dhamaato wuxuu Guddoomiyaha KMG furayaa sanaadiiqda Codeynta, Waxaana la tirinayaa codadka kadibna waxaa Guddoomiyaha KMG ku dhawaaqayaa cidii ku guuleysatay Jegada Guddoomiyaha Golaha.
13. Ka hor inta aanu xafiiska la wareegin Guddoomiyaha Waa inuu ka tago xilka uu ka hayo xisbiga siyaasadeed, Waana in uu shaqadiisa u guto si dhexdhexaad ah.
14. Doorashooyinka Guddoomiye Ku xigeenada, Waxaa la waafajinayaa Habraaca Doorashada Guddoomiyaha.

## CUTUBKA 3-AAD: GUDDOONKA, XAFIISKA HABDHOWRKA IYO GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA

## QODOBKA 6-AAD: GUDDOONKA, GUDDIGA JOOGTADA IYO XAFIISKA HABDHOWRKA

1. Guddoonka Aqalka Sare wuxuu ka kooban yahay:
    - b. Guddoomiyaha Aqalka Sare.
    - t. Guddoomiye ku xigeenka Koowaad.
    - j. Guddoomiye ku xigeenka Labaad.
2. Xafiska Habdhowrka Aqalka Sare wuxuu ka kooban yahay:
    - b. Habdhowraha iyo,
    - t. Ku xigeenkiisa

3. Habdhowraha iyo ku xigeenkiisa waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha waxaana soo magacaabaya Guddoomiyaha isagoo la tashanaya ku-xigeenadiisa, kadibna waxaa ansixinaaya Golaha oo ku meel marinaaya cod hal dheeri ah tirada xubnaha Golaha oo gacan taag ah, waxaana xilka ka qaadi kara isla Golaha oo ku meel marinaaya cod hal dheeri ah ka dib markii ay mooshin ka keenaan 25% (14 Xubnood) ee xubnaha Golaha.

## QODOBKA 7-AAD: XILKA GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE

Guddoomiyaha Aqalka Sare:

1. Wuxuu mas'uul ka yahay Fulinta iyo dhowrista xeer hoosaadka, ilaalinta nidaamka golaha, Wuxuu ilaalinayaa Habsami usocdka Howlaha Golaha sida Sharci-dejinta, Maamulka iyo hab maamuuska.
2. Wuxuu furayaa Fadhiyada, Wuxuu sheegayaa Saacadaha, Barnaamijka iyo ajandaha fadhiga soo socda oo qoraal ahaan lagu soo wergelinaayo Golaha Aqalka Sare.
3. Wuxuu Guddoomiyaa shirka Golaha.
4. Wuxuu kormeerayaa shaqada hab dhowrayaasha iyo maamulka Golaha.
5. Wuxuu matalaa kuna hadlaa magaca Aqalka Sare taasoo ka hor imaanaynin ama wax u dhimaynin hanaanka sharci dejinta iyo go'aanada Goluhu qaadan doono.
6. Wuxuu xirriiriyaa Golaha iyo Baarlamaanada Aduunka.
7. Wuxuu saxiixayaa Heshiisyada Caalamiga ah ee Goluhu la galo Baarlamaanada Aduunka iyo Hay'adaha kale ee khuseeya hawlihiisa, kuwaas oo uu hor keenayo Golaha.
8. Wuxuu kala tashanayaa ku xigeenadiisa arrimaha siyaasada iyo Maamulka Golaha.
9. Wuxuu gudoomiyaa Guddiga Joogtada ah iyo Guddiga adeegga Golaha Aqalka Sare.
10. Guddoonka Aqalka sare wuxuu u diri karaa Guddi hawleed ka kooban xubno ka mid ah Aqalka Sare meel kasta oo ka mid ah dalka.

## QODOBKA 8-AAD: AWOOADAHA GUDOOMIYAHA XILIGA KALFADHIGA

1. Mar walba ee Gudoomiyuhu hadlaayo waa inuu fadhigiisa ku noqdaa Senatorkii markaa hadlaaye loona dhageysto Gudoomiyaha si aamusnaan ku jirto.
2. Gudoomiyaha ayaa mas'uul ka ah dhaqan gelinta Xeer-hoosaadka Golaha go'aan Soo jeedin nuxur leh ka dib marka la soo ogeysiiyo Golaha.
3. Gudoomiyuhu wuxuu ku amri karaa Sanatorkii wax ku daristiisu aysan la xirriirin Mowduuca ama aflagaado sameeyay in uu fadhigiisa ku noqdo.
4. Sanatorkii ku adkeysta arrinkaas waxaa laga saarayaa inta ka hartay fadhiga maalinkaas.
5. Haddii ay jirto fowdo iyo nidaam darro Gudoomiyuhu wuxuu xiri karaa fadhiga ama dib u dhigi karaa fadhiga ilaa maalinta uu isagu tilmaamo.
6. Lalama soo geli karo Goobta shirka hub iyo wax kasta oo wax u dhimi Kara amniga.
7. Awoodaha halkaan lagu siiyay Gudoomiyaha Waxaa kale oo si lamid ah u isticmaali kara Gudoomiyayaasha Guddiyada Marka uu socdo Fadhiyada Guddiyada.

## QODOBKA 9-AAD: XILKA GUDOOMIYE KU XIGEENADA GOLAHA

1. Gudoomiyaha Aqalka Sare marka uu maqan yahay ama uusan qaban karin xilkiisa, Sabab kasta ha ahaatee, Waxaa dhammaan hawshiisa qabanaya Guddoomiye Ku xigeenka 1aad ee Golaha.

2. Gudoomiyaha Aqalka Sare iyo ku xigeenkiisa 1aad marka ay maqan yihiin ama aysan qaban karin Xilkaas, Sabab kasta ha ahaatee, Waxaa dhammaan hawshaas qabanaya Gudoomiye Ku xigeenka 2aad ee Golaha.
3. Haddii Gudoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen ay ka baxaan goobta shirka duruufo caafimaad ama shaqo dartood, Goluhu wuxuu dooranayaa xubin Gudoomisa fadhigaas.

## QODOBKA 10-AAD: XIL WAAYIDDA GUDOOMIYAHA GOLAHA IYO LABADIISA KU XIGEEN.

1. Gudoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku xigeen waxay Xilka ku waayi karaan arimaha Soo socda:
   b.Geeri
   t. Istiqaalo Qoraal ah oo uu soo gudbiyay Golaha ama mid oraah oo uu ka sii daayay warbaahinta.
   j. Maqnaansho Cudur daar la'aan oo gaaraysa 45 cisho oo isku xigta.
   x. Ku xad gudub Shareecada Islaamka, Dastuurka Qaranka ama Shuruucda Qaranka.
   Kh. Xil Gudasho la'aan Joogta ah Sida:
   - Dhimirkiisa oo wax ka dhiman (waali) Taasoo loo baahan yahay in ay soo Cadeeyaan Guddi dhakhaatiir ah oo leh aqoon iyo khibrad Laguna kalsoonaan karo.
   - Caafimaad daro Joogto ah ama awood beelid uusan xilka la Gudan Karin, Taasoo loo baahan yahay in ay soo cadeeyaan Guddi dhakhaatiir ah oo la aqoonsanyahay, laguna Kalsoon yahay.
   - Xukun Kama Dambeys ah oo ay ku riday Maxkamad Awood leh oo uu ku muteysanaayo xabsi aan ka yareyn 6 bilood.

2. Soo jeedinta xil ka qaadida ee xubin kasta oo ka mid ah Guddoonka Golaha, Kuna saleysan asbaabaha Kor ku xusan farqada 1-aad, , xarfkeeda (b.t.j) waxaa keeni kara Xubno aan ka yareyn tiradoodu ka yereyn Seddex meelood meel (1/3) ama Xubnaha Matalay Hal dowlad Goboleed oo isku dhan.

3. Codka Xil ka qaadista wuxuu ku ansaxayaa Aqlabiyad seddex meelood laba meel (2/3) Tirada Guud ee Xubnaha Golaha, Sidoo kale markay isku raacaan. Xubnaha Matalaya afar maamul Goboleed oo isku dhan.

   b. Soo jeedin Xil ka qaadista ee ku aadan Gudoomiyaha/ Ku xigeenadiisa waa inuu ahaadaa mid Sababeysan oo ku saleysan Sharciga.

   t. Markii la keeno soo jeedinta Xil ka qaadista Guddoomiyaha/Ku xigeenadiisa, loona soo gudbiyo Guddonka Golaha Aqalka Sare, wuxuu haysan karaa oo kaliya labo (2) maalmood oo ah maalmo shaqo oo ay ku eegayaan in uu raacsan yahay habraacii Sharciyeed ee soo jeedintaas, kadibna loo gudbiyo Fadhiga Golaha.

   j. Soo jeedinta Xil ka qaadista waxaa laga doodayaa loona codeynayaa Shan (5) Cisho oo maalin shaqo ah Gudohood, Laga Bilaabo Taariikhda soo jeedinta la hor keenay Fadhiga Guud ee Golaha Aqalka Sare, hadii loo waayo guntan looga doodo, looguna codeeyo muddadaas Shanta (5) maalin ah kadib cilad farsamo awgeed, soojeedintaas way jireysaa.

4. Haddii Gudoomiyaha ama Mid ka mid ah Ku xigeenadiisa ay soo wajahdo soo jeedin xil ka qaadis ah waxaa la marayaa talaabooyinka soo socda:

b. Gudoomiyaha ama Ku xigeenada laga keeno soo jeedinta xil ka qaadida, Waa in laga wareejiyo Gudoominta Fadhiyada inta ay ka dhamaanayso arinta la xeriirta soo jeedinta codeyntuna waa qarsoodi.

t. Hadii Gudoomiyaha ama Gudoomiye ku xigeen uu lumiyo Xilka, si waafaqsan Qodobka 9 (2) ee xeer hoosaadka Golaha, Goluhu wuxuu muddo Shan iyo toban (15) maalmood Gudahood ku dooranayaa Gudoomiye ama Ku xigeen cusub.

## QODOBKA 11-AAD: XILKA HAB DHOWRAHA GOLAHA IYO KU XIGEENKIISA.

Hab dhowraha Golaha iyo ku xigeenkiisa ayagoo Raacaya awaamiirta Gudoomiyaha waxay u xil saaran yihiin :

1. Dhawrista Nidaamka Golaha
2. Nabadgelyada, Xasiloonida Goobta iyo xubnaha Golaha
3. Kormeerka iyo Hubinta Dhaqan-gelinta jadwalka Safarada xubnaha Golaha iyo Habmaamuuskooda.
4. Kormeerida , Xanaanada hantida Golaha
5. Kormeerida Xafladaha, Dhowrista Habmaamuuska, ilaalinta qaab fadhiga Golaha iyo martida.
6. Wixii kaloo hawl ah oo Gudoonka u xil saaro.

## QODOBKA 12-AAD: GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA.

1. Guddiga joogtada ah ee Goluhu wuxuu ka koobanyahay: Gudoomiyaha Golaha ,Ku xigeenadiis, Habdhowrka, ku xigeenkiisa iyo Gudoomiyayaasha Guddiyada Golaha Aqalka Sare.
2. Gudoomiyaha Golaha ayaa Shir Gudoominaya Shirka Guddiga Joogtada ah.
3. Xilka iyo waajibaadka Guddiga joogtada ah waa sida soo socota:

b. Wuxuu diyaariiyaa isla markaana maamulaa barnaamijyada iyo howlaha Kalfadhiyada Golaha.

t. Wuxuu diyaariyaa isla markaana maamulaa Jadwal Qorsheedka Fadhiga Golaha.

j. Wuxuu Xirriiriyaa Golaha iyo Guddiyadiisa.

x. Ilaa inta laga dhisaayo Xafiiska Guddiga Adeega Baarlamaanka Wuxuu diyaarinayaa Sanad miisaaniyadeedka Aqalka Sare una Gudbiyaa ku tala galka Miisaaniyadda Aqalka Sare si loo ansixiyo isla markaana xakameyn Miisaaniyadeed loogu sameeyo hawlaha dhaqaale ee Golaha.

4. Wuxuu ogolaadaa Barnaamij Shaqo ee guddiyada Golaha oo ay ka mid yihiin haddii loo baahanyahay Socdaal iyo kulamo lagu qabanayo meelo ka baxsan Dhismaha Golaha ka dib markay Goluhu ansixiyaan.

5. Wuxuu ka doodaa, go'aanna ka gaaraa warbixinta Guddiyada ee loogu doodi doono Golaha.

6. Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare waxaa lagu Qaadanayaa Imtixaan.

## QODOBKA 13-AAD: XILKA IYO WAAJIBAADKA XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA AQALKA SARE.

**Xooghayayaha guud ee Goluhu wuxuu u xilsaaran yahay:**

1. Xoghayaha Guud waa mas'uulka ugu sareya shaqaalaha rayidka ah ee ka shaqeeya Golaha Aqalka Sare.

2. Inuu ku wargaliyo Xubnaha Aqalka Sare wakhtiyada shirarka iyo kal-adhiyada Golaha 24 saac ka hor, haddaan Guddoonku muujin xaalad deg-deg ah. Wargalinta waa in ay noqotaa mid qoraal ah iyadoo lagu lifaaqayo nuqul Ajendaha shirka.

3. Inuu hubiyaa in la wargaliyey Xubnaha Aqalka Sare wakhtiyada shirarka iyo kal-fadhiyada Golaha.

4. Kormeerka shaqaalaha Golaha marka ay gudanayaan waajibaadka hoos ku qoran:

    b. Hubinta diyaarinta iyo u qeybinta qoraalada ay xubnuhu u baahan yihiin Fadhiga ka hor.

    t. Hubinta guntankada (quorum) kadib markuu Guddoonka codsado.

    j. Diiwaangalinta magacyada Xubnaha doonaya inay hadlaan ayadoo la tixgalinayo sidii ay u soo kala hor codsadeen.

    X. Hubinta qaadista maxdarrada (minutes) fadhiga Golaha.

    Kh. Tirinta codadka la bixiyay iyo arrimaha kale ee Golahu go'aan ka gaaray, hadal qoraalka, hadalka iyo sixitaanka.

    d. Hubinta saxnimada qoraalada iyo xannaanada Buuga diiwaangelinta xaadirinta xubnaha Golaha Aqalka Sare.

    r. Hubinta in dhammaan go'aannada iyo xeerarka Golahu soo saareen ay raad-raac sax ah laga reebo si wannagsanna loo diiwaangeliyo.

5. Wuxuu u soo bandhigaa Xubnaha Ajendaha maalin kasta bilawga Fadhiga.
6. Xoghayaha Guud, isagoo la tashanaya Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, waa in uu la xiriiraa Xoghayayaasha Golayaasha Xeerdejinta Maamul Goboleedyada si uu ula wadaago Shuruucda iyo hawlaha kale ee saameynta ku leh maamul Goboleedyada kadibna talo soo jeedintooda ugu soo gudbiyaan Golaha Aqalka Sare si wada shaqeynta Golaha iyo maamul Goboleedyada loo xoojiyo

7. Wuxuu qabanayaa wixii kale oo howl ah uu Guddoonku u Xil saaro.

8. Wuxuu Guddoomiyaha Golaha la saxiixayaa Qoraallada maxdarrada Fadhiyada Golaha.

## CUTUBKA 4- AAD: XUBANAHA GOLAHA AQALKA SARE

## QODOBKA 14-AAD XILKA XUBNAHA AQALKA SARE

1. Xubin kasta oo Aqalka Sare ka mid ah marka ay Xilkeeda Gudanayso waa in ay ku shaqeysaa sida ay danta dalka, dadka iyo diintu Ku jirto sida ku cad qodobka 96aad ee dastuurka.

2. Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare, xil gaar ah ayaa ka saaran matalidda Dowlad Goboleedka laga soo doortay, iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageero Xisbi.

3. Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare, waxaa waajib ku ah in ay soo xaadirto dhammaan kulamada Fadhiga Golaha, kulamada Guddiyadda, dhageeysiga dadweyne iyo hawlaha kale waajibka ah ee Golaha si waafaqsan qodobka 61[aad] ee Dastuurka ku meel gaarka ah.

4. Xilliga fasaxa, Xubnaha Aqalka Sare Waxaa looga baahanyahay Arrimaha Soo Socda:

   b. Inay qabtaan kulamo Guud oo ay bulshada kula socdsiinayaan arimaha Golaha Horyaal si ay ugula tashadaan.

   t. Inay kala hadlaan hormarinta iyo midnimada Qaranka, Nabada iyo dib- uheshiisiinta.

   j. Inay ka dhageystaan talooyinkooda iyo baahida Dowlad Goboleedkooda.

   x Inay Golaha ugu soo gudbiyaan warbixin qoraal ah wixii ay kala soo kulmeen booqasho hawleedkooda.

## QODOBKA 15-AAD: XUQUUQDA XUBNAHA GOLAHA

1. Xuquuqda Gunno ee Guddoonka iyo xubnaha Golaha Aqalka Sare Waxay ka Bilaabanaysaa Maalinta Loo dhaariyo Xilka waxayna u kala Baxdaa:

   ✓ Gunno xileed Bille ah

   ✓ Gunno Fadhi, oo ku salaysan soo xaadirida Fadhiyada Golaha iyadoo laga soo saari doono Xeer gaar ah.

   ✓ Gunno Deegaan

   ✓ Gunno Caafimaad

   ✓ Gunno Gaadiid

   ✓ Sahay Safar shaqo

   ✓ Gunnooyinkaas waxaa lagu muujinayaa miisaaniyadda Golaha

   ✓ Wixii xuquuq ah ee ka maqnaada Xubnaha Golaha Muddada ay xilka Hayeen, Waxaa Waajib ku ah Xukuumad kasta ee timaada in ay bixiso xaquuqda uu muteystay oo buuxda.

   ✓ Xubin Kasta oo dib loo soo dooran waayo Wuxuu xaq u leeyahay laba Bilood oo

Gunno sagootis ah sanadkiiba oo ku jaan Go'an mudadii uu soo shaqeeyay waxaana lagu soo saarayaa Sharci Gaar ah.

- ✓ Xubintii laga Qaaday Xasaanada (si aan rasmi ahayn) waxaa uu haysanayaa Gurigii iyo Gaadiidkii dowlada, Wuxuuna qaadanayaa gunnooyinkiisa oo dhan marka Laga reebo gunno Fadhi, hase yeeshee Kama qayb Galaayo Fadhiyada Golaha mana yeelanayo cod, ilaa inta Maxkamadu arintaa ka gaareyso xukun – kama dambeys ah.
- ✓ Haddii Xubin la eedeeyay lagu waayo dambigii lagu eedeeyay, wuxuu xaq u yeelanayaa in loo soo celiyo Xasaanadiisii la siiyana dhamaan xuquuqdii ka Baaqatay.
- ✓ Daaweynta Xubnaha Senatorada iyo Xubnaha Qoyska (Xaaskiisa /Odeygeeda, Caruurtooda) Waxaa Damaanad Qaadeysa Dowlada.
- ✓ Muddada Haweenka Xubinta Ka ah Golaha Aqalka Sare ay ku jiraan Fasaxa Dhalmada Waxay xaq u leeyihiin in la gaarsiiyo Documentiga La Xeriira Howlaha Golaha, Go'aanada uu gaaro Fadhiyada Caadiga ah iyo kuwa aan Caadiga aheyn 15 kii Maalmoodba Mar.
- ✓ Wixii la xeriira fasaxa dhalmada iyo muddadiisa Waxaa la waafajinayaa Shuruucda Dalka.
- ✓ Xubin kasta oo Aqalka Sare ka Tirsan wuxuu xaq u leeyahay inuu helo ilaalo Sugta Amnigiisa, wade Baabuur iyo Gunnadooda.

2. Guddoomiyayaasha, ku xigeenadooda iyo Xoghayayaasha Guddiyada Golaha Aqalka Sare waxey leeyihiin gunno xileed bileed ah iyadoo lagu Muujinaayo Miisaaniyadda Golaha Aqalka Sare.

## QODOBKA 16-AAD: XASAANADDA XUBNAHA AQALKA SARE

1. Xubnaha Aqalka sare waxa ay leeyihiin xasaanad, Sida ku xusan Qodobka 70aad iyo 78aad ee dastuurka.
2. Sida ku xusan qodobka 70aad (2) ee dastuurka, Marka xubin laga Qaadayo Xasaanada waa in ay ogolaadaan aqlabiyad hal dheeri ah tirada guud ee Golaha (50%+1) iyadoo tirada golaha laga Reebayo kuraasta banaan (Post Vacant) ee ay sababtay Geeri, Tanaasulid ama si sharci ah u bannaan.

## QODOBKA 17-AAD : XAADIRIDA FADHIYADA GOLAHA

1. Xubin kasta waxaa waaajib ku ah inuu soo xaadiro Fadhiyada Golaha.
2. In diinwaan gelinta Xubnaha La bilaabo 8:00 subaxnimo Waxayna Xirmaysaa 8:55 Subaxnimo.
3. In Guddoonka uu soo fadhiisto halka loogu tala galay 9:00 Subaxnimo Shirkuna furmo.
4. Haddii aan la helin Guntanka (Quorum) in Guddoonka Golaha uu dib u dhigo furitaanka kulanka muddo hal saac ah.
5. Guntanka haddii uu buuxsami waayo saacaddaaas ka dib Guddoonka Fadhiga wuu xirayaa.

6. Haddii la Gaaro 08:55 subaxnimo waxaa la Joojinayaa Diinwaangelinta xubanaha Aqalka Sare Waxaana Buuga Xaadirinta Xubanaha Loo Gudbinayaa Xafiiska Aqalka Sare.

7. Mudanayaasha kasoo daba mara 09:00 subaxnimo Waxaa lagu qori doonaa liis gaar ah.

8. Soo daahidda 3 Maalmood waxay la mid tahay Maqnaansho hal maalin haddii uusan jirin cudur daar Sharciga waafaqsan, waxaana Laxisaabinayaa dhamaadka Kalfadhi kasta.

9. Xilliga shaqada Golaha Waa inta u dhaxeysa 8:00 Subaxnimo ilaa 01:30 duhurnimo.

10. Haddii xilliga shaqada ay dhamaato balse ay yaalaan Ajendooyin muhiim ah una baahan in laga dooddo, Guddoonka wuxuu Xubanaha Aqalka Sare usoo Jeedin karaa in doodda lasii wado.

11. Tirada ugu badan ee mar keliya Fasax ku maqnaan karto waa inaysan ka badan 10 xubnood.

12. In fasaxa Guddoonka uu bixiyo uusan ka badan 30 cisho oo (xeriir ama teel teel ah) halkii Kalfadhi hadaan Xaalad Gaar ihi jirin.

13. Xubintii Fasax la'aan ama Cudur-daar la'aan Maqnaado/Maqnaato Fadhiyadda Wuxuu/ waxay Mutaysanaysaa Ganaax Laga Jaraayo Gunno maalmeedka Fadhiga.

14. Haddii Xubini soo xaadirto Bilawga Fadhiga kadibna iska boxo fasax la'aan iyadoo fadhigii weli socdo, wuxuu la mid yahay lana xukun yahay Xubanaha ka maqan Fadhiga.

## QODOBKA 18-AAD: LABBISKA IYO HEYBADDA XUBNAHA AQALKA SARE

Labiska Xubnuhu wuxuu noqonayaa waqtiga fadhiga sida soo socota:

1. Raggu wuxuu soo xiranayaa SUUD, SARAYAANO (ISKU JOOG AH) ama sarwaal iyo shaar gacmo dheere ah oo Qoor xir leh (Tie) iyo kabo Xiran.

2. Gabdhuhu Waxay soo xiranayaan canbuur gacmo dheere ah iyo garbo saar weyn ama cabaayad iyo garbo saar weyn, kabo labiskeeda Ku haboon iyo wixii kale oo haybadooda Muujin kara dhaqanka iyo Shareecadana waafaqsan.

## QODOBKA 19-AAD: WAAYIDDA XUBINIMADA AQALKA SARE

Xubinimada Aqalka Sare waxaa lagu lumin karaa:

1. Geeri;

2. Xil gudasho la'aan joogto ah sababo caafimaad darteed oo dhakhaatiir takhasus u leh ay soo cadeyeen.

3. Inuu usoo Gudbiyo istiqaalo qoraal ah Guddoonka, lagana Ogolaado.

4. Ka maqnaansho laba kal-fadhi oo caadi ah iskuna xiga ayadoo aanay jirin sabab maangal ah.

5. Haddii ay xubintu aqbasho Xil Dowladeed aan wasiir ka aheyn.

6. Haddii la hakiyo Xuquuqdiisa muwaadinimo sida ku cad Sharciga.

7. Hadii Senetarka uu lumiyo Xubinimada Golaha si waafaqsan Qodobkan, Waa in muddo lixdan (60) maalmood Gudahood ah lagu soo buuxiyaa Booska banaanaaday iyadoo la raacayo habraacii lagu soo doortay Xubnaha Golaha Aqalka Sare.

## CUTUBKA 5-AAD: MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## QODOBOKA 20-AAD DOORASHADA MADAXWEYNAHA

### Qeybta Koowaad

1. Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka oo kaashanaya Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare waa inuu u qeybiyo Dhamaan Xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

2. Warqadda Soo jeedinta Musharaxa ee lasoo Gudbinayo Waa inay ahaadaan Qaabka ku cad foomka (C) waana inay ka muuqdaan magacyada iyo saxiixyada ugu yaraan 20 xubnood oo Golaha Aqalka Sare ama Mid ka mid ah Dowladaha xubinta ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3. Warqadda soo Jeedinta wa in ay la socotaa Warqad Cadeyn ah oo leh qaabka jadwalka (D)

4. Xubina ma saxiixi karo wax ka badan saddex warqad soo jeedin musharax.

5. Xoghayaha waa in loo soo Gudbiyo Warqadaha soo jeedinta waana inuu siiyaa Musharaxa Warqada Qabashada ee jadwalka ( E)

6. Labada Xoghaye Guud ee labada Gole waa inay Wadajir u hubiyaan in dhamaan Musharaxiinta ay soo buuxiyeen shuruudaha Madaxweynenimo.

7. Haddii musharax lasoo jeediyay Buuxin waayo shuruudaha Madaxweynenimo, labada xoghaye Guud waxay ku celinayaan cida soo jeedisay isaga oo qoraal ahaan ku lifaaqaayo Sababaha loo celiyay soo jeedinta Musharaxa Sida Jadwalka (F)

8. Liiska musharaxiinta soo buuxiyay shuruudaha waa in la daabaco isla markaana waa in:

   b) Uu ka koobnaadaa magacyada musharaxiinta Tartamaya oo u qoran qaabka kala horeeynta xuruufta sida ay ugu qornaayeen warqadaha Soo jeedinta musharaxiinta, loona qaybiyaa dhamaan Xubnaha Golaha Aqalka Sare Laguna baahiyo warbaahinta.

   t) Lagu dhejiyaa boorka ogaysiiska ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ama goobtii kale ee lagu qabanayo.

## Qeybta Labaad: Hanaanka Codeynta

1. Labada Xoghaye Guud Waa inay si wada jir ah u tilmaamaan Goobta Codeynta ayagoo la taashanaayo labada Guddoon ee Labada Gole.
2. Inay Cadeyaan saacadaha codayntu dhacayso.
3. In ay ogeysiiyaan saacada iyo goobta Doorashada Xubnaha labada Gole iyo musharaxiinta.
4. Guddiga Doorashada Madaxweynaha oo ka kooban labada Gole ayaa socodsiinaya Nidaamka codeynta Waxaana u fududeynaya labada Xoghaye Guud.
5. Warqad walba ee codayn waa inay tiimbaraysnaataa. warqada codaynta iyo tiimbaraheedaba waa inay ahaadaan qaabka Jadwalka (G) iyadoo loo bedeli karo sida ay soo jeediyaan Labada Gudoomiye.
6. Magacyada Musharaxiinta waa inay ku daabacnaadaan warqada codaynta sida ay ugu qoranyihiin liiska Musharaxiinta ee lagu daabacay sida ku cad Faqrada 8aad ee qodobkaan.
7. Sanduuqa Codaynta waa inuu yeeshaa naqshad uu horey Guddoomiyuhu Ansixiyay
8. Murashaxa la xaqiijiya lagana soojeediyay Baarlamaanka waa inuu Guddoomiyuhu siiyaa ugu yaraan toban daqiiqo (10) oo uu kula hadlo Baarlamaanka.
9. Xoghayaha Guud waa inuu ka hor bilaabashada doorashada:
   - Ogolaadaa baaridda Sanduuqa loo adeegsan doono Codaynta doorashada
   - Hubiyaa in Sanduuqa codbixinta yahay mid qufulan, dhexdiisane wax laga arki karo isla markaana dusha kore ku leh qayb jeexan oo loogu talagalay in lagu rido Warqada codbixinta.
   - Ka saaraa goobta codaynta dhamaan dadka marka laga reebo -

     b) Saraakiisha Doorashada

     t) Xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo

     j) Cid waliba oo uu u ogolaado Xoghayaha Guud.

10. Xoghayaha Guud waa in uu xiraa codaynta marka uu xaqiijiyo inay dhammaan xubnaha Golaha Aqalka Sare dhiibteen codkooda.
11. Xoghayaha Guud waa inuu ku haystaa goobta codaynta diwaanka saxda ah ee magacyada Xubnaha Golaha Aqalka sare ee codayn kara.
12. Xubin kasta waa in uu saxeexaa diwaanka cod bixinta kadibna la siiyo warqada codaynta.
13. Xubintii ay warqada codaynta ka khaldanto wuxuu Xoghayaha Guud siinayaa warqad codayn cusub. Warqadii codaynta ee khaldantay waa la burinayaa.
14. warqadaha codaynta ee la buriyay waxaa lagu ridayaa baqshad gooni ah

15. Xubin kasta oo Baarlamaanka ka tirsan marka uu dhiibanayo codkiisa wuxuu warqadiisa codaynta saarayaa calaamadda sax halka ka soo horjeeda magaca musharaxa uu siinaayo codkiisa.
16. Xubin waliba ee la siiyay warqada codaynta waa inuu ilaaliyaa sir ahaanshaha Codaynta.
17. Markii Xubinta Codeynaysa hesho warqada Codaynta waa
    - inuu tago goobta codaynta
    - inu u dhiibtaa codkiisa si waafaqsan faqrada 20aad
    - Inuu isku laabaa warqada codaynta si uu u qariyo codkiisa
    - Inuu ku ridaa warqada codaynta ee isku laaban sanduuqa codaynta
    - Inuu dib ugu laabto kursigiisa
18. Looma ogola Senator kale inuu galo goobta codaynta isagoo Senator kale ku jiro

19. Haddii uusan Senatorku akhrin karin warqada codaynta sababo indha la'aan darteed ama cuuryaanimo uusan la codayn karin waxaa ugu codaynaya labada Xoghaye Guud ee labada gole sida uu doonayo.

## Qaybta Sedaxaad - Tirinta Codka:

1. Tirinta Codka waxay bilaabmaysaa isla marka uu codeeyo xubinta ugu dambeysa iyada oo aay arkayaan xubnaha oo dhan, balse looma ogola xubinta codeysay inay timaado miiska tirinta codka masaafo u jirta labaatan mitir (20).
2. Marka Gudoomiyaha Golaha Shacabka amro Gudoomiyaha Guddiga Doorashooyinka:

b) Waa in la furo Sanduuqa codbixinta.
t) Gudoomiyaha Guddiga Doorashooyinka Warqadaha Sanduuqa lagu Codeeyay ku jira mid mid buu uga saarayaa isagoo ku dhawaaqaya tan sida saxda ah loogu codeeyay iyo tan sida Qaldan loogu codeyay iyo Musharaxa Codkaas Helay.

3.Warqada Codaynta waxay Buraysaa marka -

- Calaamada saxda ah aanay ku oolin.
- Calaamada saxda ah haddii ay ku hortaalo wax ka badan hal musharax Magaciisa ama aysan cadayn musharaxa ay saxdu ku hortaalo.

4. calaamad kasta oo aan ka ahayn calaamada codaynta ee ku cad faqradda 19aad way bureysaa.

5. Xubin ka mid ah Guddiga Doorashada Madaxweynaha ayaa yeerinaysa Codadka ay heleen Musharaxiinta isagoo kor ugu dhawaaqaya magaca musharaxa helay codka warqadaas.

6. Marka la dhameeyo tirinta codaynta lana go'aansho natiijada, Gudoomiyaha Guddiga Doorashada waa :-

b) Inuu qoraa natiijada uu helay Musharax waliba iyo Codadka buray (Xumaaday)
t) Inuu u gudbiyo Natiijada Guddoomiyaha Golaha Shacabka
j) Guddoomiyha waa inuu ku dhawaaqo natiijada isla markaana shaaciyaa Musharaxa ku guulaystay Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

7. Xoghayaha Guud waa inuu xiraa Sanduuqa Codbixinta.

8. Xoghayaha Guud waa inuu ku kaydiyaa bashqado kala duwan mid walbana lagu dul qoraa magaca musharaxa isla markaana bashqad walba ku shaabadeeyaa Shaabadiisa :-

b) Nuqulka Diiwaanka Codaynta
t) Warqadaha codbixinta buray (Xumaaday)
j) Warqadaha codbixinta aan la isticmaalin

9. Haddii uusan Musharax helin aqlabiyad seddex meelood laba meel (2/3) codadka wareega koowaad, waxaa Wareega labaad loo gudbinayaa afarta musharax ee ugu codka badan wareega koowaad.

10. Musharaxii hela wareega labaad aqlabiyadda seddax meelood laba meel (2/3) Xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa noqonaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

11. Haddii aan la helin Musharax hela aqlabiyadda seddax meelood laba meel (2/3) wareega seddexaad, waxaa wareega seddaxaad loo guddbinayaa labada Musharax ee hela codadka ugu badan. Musharaxa hela codka ugu badan wareega seddaxaad ee hela cod hal dheeri ah (50%+1) tirada codeysay ayaa noqonaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Sederaalka Soomaaliya.

12. Haddii bar bar dhac yimaado wareega seddaxaad, codbixintaas waa lagu celinaa waxaana loo gudbayaa wareegs Afaraad isla fadhigaas.

## Qaybta Afaraad – Keydinta Dokumentiga Doorashada

- ✓ Sanduuqa Codaynta iyo bashqadaha warqadaha codaynta iyo dhamaan warqadaha la xiriira doorashada waa in lagu keydiyaa halka uu Guddoomiyuhu tilmaamo.
- ✓ Bashqadaha warqadaha codaynta ha saxnaadaano ama kuwa buray (xumaaday) iyo dhamaan bashaqadaha lagu keydiyay diiwaanka codaynta waxaa lagu furi karaa oo keliya amarka maxkamad awood u leh.
- ✓ Bashqadaha iyo dhamaan warqadaha kor ku xusan waxaa la keydinayaa oo keliya muddo lix bil oo laga bilaabo maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo kadibna waa la baabi'inayaa

## QODOBKA 21-AAD: DHAARINTA MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

Sida uu qabo qodobka 96aad ee Dastuurka, ka hor Inta uusan xilka bilaabin, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu Baarlamaanka Federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartaas oo ah sidan:

**"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaal".**

## QODOBKA 22-AAD: EEDEYNTA IYO XIL KA QAADISTA MADAXWEYNAHA JFS.

Aqalka Sare wuxuu ka qayb qaadanayaa xil ka qaadista Madaxweynaha Sida ku cad qodobka 92aad ee Dastuurka.

## CUTUBKA 6-AAD: KALFADHIYADA IYO FADHIYADA AQALKA SARE

## QODOBKA 23-AAD: KALFADHIYADA IYO FADHIYADA AQALKA SARE

1. Sida ku xusan qodobka 74aad ee Dastuurka, Aqalka Sare wuxuu sanadkiiba yeelanayaa laba kalfadhi oo caadi ah. Kalfadhi kasta ee Goluhu wuxuu soconayaa muddo afar bilood ah.
2. Kalfadhiga Hore ee Aqalka Sare wuxuu furmaya 5th **Janaayo** wuxuuna xirmaya **5th May** Kalfadhiga Dambe ee Aqalka Sare wuxuu furmayaa **5th july** wuxuuna xirmayaa **5th November** ee Sanad kasta.
3. Haddii sababo Jira awgood, Kalfadhiyada ay raaci waayaan qaabka kor ku xusan, markaas waxaa Kalfadhiga laga dhigayaa taariikhda ugu horeysa ee suurta galka ah.
4. Goluhu wuxuu qaban karaa Kalfadhiyo aan caadi aheyn.
5. Fadhiyada ama Kalfadhiyada waxaa ay soconayaan ilaa laga dhammeeyo Ajendaha hor yaalla Golaha iyo Hindisa Sharciyeedyada degdegga ah.

## QODOBKA 24-AAD: KALFADHIYADA AAN CAADIGA AHEYN EE GOLAHA

Iyadoo la waafajinayo sida uu qabo qodobka 74aad, faqradisa 4aad ee Dastuurka, Kalfahdiyada aan caadiga aheyn waxa ay qabsoomayaan haddii:

1. Madaxweynuhu isugu yeero.
2. Ra'iisal Wasaaruhu isugu yeero.
3. Guddoomiyaha Aqalka sare isugu yeero.
4. Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan xubnaha matala laba Maamul Goboleed oo ka tirsan Dawladda Federaalka Soomaaliya.
5. Haddii ay soo jeediyaan saddex meelood meel (1/3) tirada Guud ee xubnaha Golaha Aqalka Sare.

## QODOBKA 25-AAD: AJENDAHA

1. Guddiga Joogtada ah ee Goluhu wuxuu diyaariyaa Ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha. Ajendaha waxaa loo qeybinayaa Xubanaha Golaha ugu yaraan 12 saacadood ka hor fadhiga loo dhan yahay.
2. Ajendaha kulan walba waxaa lagu ansixinayaa cod gacan taag ah, haddii aysan ugu yaraan 5 xubnood bilowga fadhiga u gudbin guddoomiyaha Golaha soo jeedin qoraal ah oo wax lagaga bedelayo Ajendaha iyagoo soo jeedinayo arrin deg-deg ah. Soo jeedintuna waa in ay ku saxiixan yihiin xubnaha taageeraya.
3. Ajendaha haddii ay codsadaan ugu yaraan 5 xubnood in wax cusub lagu daro ama wax laga beddelo waxaa Gudoonka laga doonayaa in uu ku daro Ajendaha isla fadhigaas haddii ay u codeeyaan (50% + 1) ee tirada golaha fadhida.

## QODOBKA 26: SIDA AY ISUGU XIGAAN HAWLAHA FADHIYADA GOLAHA:

Marka uu qabanayo howshiisa, Goluhu wuxuu raacayaa nidaamkan hoos ku qoran:

1. Guddoomiyaha ayaa shirka furaaya sheegayana tirada joogta
2. Akhrinta aayadaha Qur'aanka kariimka
3. Ansixinta Ajendaha maalintaas.
4. Dhaarinta xubnaha cusub haddii ay jiraan.
5. Waqtiga Su'aala weydiinta (Question time).
6. Soo jeedinta Gudoomiyaha.
7. Hindise Sharciyeedka marayo akhrinta koowaad.
8. Hindise Sharciyeedka marayo akhrinta labaad.

9. Warbixinta Guddiyada.

10. Hindisa Sharciyeedka marayo akhrinta sadexaad.

11. Soo jeedinta la keenay.

## QODOBKA 27-AAD: GUNTANKA (QUORUM)

1. Aqlabiyada tirada guud ee xubnaha Golaha ayaa noqonaysa guntanka 28 xubnood (Quorum)

2. Go'aannada ka soo baxa Shirarka Golaha waa sax/Sharci haddii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayay. Guddomiyaha ayaa xaqiijinaya guntanka (Quorum) inta aan codka la qaaadin, isaga ayaana go'aan ka gaaraya goor walba ee la hubinayo guntanka.

3. Ka hor intuusan Goluhu codeyn, xubin kasta oo Golaha ka tirsan waxay codsan kartaa in la hubiyo guntanka taasoo Guddoonka ku khasbeysa inuu hubiyo guntanka.

4. Codbixin kasta oo u baahan tiro cayiman, oo aan ka aheyn kuwa u baahan cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga, inta aysan cod bixinta dhicin, Gudoomiyaha waa in uu hubiyaa in ay fadhiyaan tirada loo baahanyahay ee ay ku ansaxeyso cod bixintaas.

5. Haddii ansixinta soo jeedin ama qodob Ajendaha uu u baahan yahay tiro sadex meelood labo meel (2/3), ugu yaraan sadex meelood labo (2/3) ee xubnaha Aqalka Sare waa in ay xaadir yihiin codka ka hor.

## QODOBKA 28AAD: NOOCYADA CODEYNTA

1. Cod-bixinta waxay u dhaceysaa siyaabaha soo socda:
   - ✓ Gacan taag.
   - ✓ Cod qarsoodi ah.
   - ✓ Cod-bixin qoraal ah (Magac u yeerid).

2. Cod-bixinta qarsoodiga waxaa loo sameynayaa sida soo socota:
   - ❖ Guddoomiyaha Golaha waa inuu diyaariyaa sanduuqa cod-bixinta.
   - ❖ Guddomiyaha Golaha waa in uu sharxaa habraaca codeeynta.
   - ❖ Guddoomiyaha Golaha waa inuu amraa yeerista magacyada xubnaha iyo u qeybinta xubnaha xaashida lagu codeeyo.
   - ❖ Guddoomiyaha waa inuu xaqiijiyaa xubnaha codeeyey, kuwa ka aamusey iyo kuwa xumaaday, kadibna wuxuu ku dhawaaqaa natiijada codbixinta.

3. Cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid) waxaa la qabanayaa markuu Guddoomiyaha Golaha ama ugu yaraan 5 xubnood sidaas codsadaan, Golahuna go,aankaa qaato. Marka la qaadayo cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid), xubin kasta oo codeysa magaceeda hortiisa ayaa lagu qorayaa codkeeda (haa/maya) ama maqnaanshaheeda waana in lagu hor qoraa magaciisa/magaceeda oo buuxa.

   - ❖ Sharci ahaan, haddii codeynta soo jeedin la hor keenay Golaha ay barbar dhac noqoto, Soo jeedintaas ma meel marayo. Haddii cod-bixinta ay gacan taag tahay, Guddoomiyaha ayaa codeynayo si uu u kala saaro labada dhinac markay is bar bar dhac noqdaan

- Marka laga reebo cod-bixinnada qarsoodiga ah iyo cod bixin magac u yeerid ah oo Goluhu ogolaaday sida ku qeexan Dastuurka ama Xeer-hoosaadkan , dhammaan cod-bixinnada kale ee caadiga ah waa gacan tag, loona tiriyaa saf saf.
- Xubnaha jooga fadhiga balse aan ka qeyb qaadan cod-bixinta waxaa loo xisaabinayaa sida codadka xubnaha aamusay oo kale.
- Inta looga dhawaaqayo natiijada cod-bixinta, xubin Golaha ka tirsan looma ogola In ay hadal u jeediso Golaha.
- Haddii la ogaado in ay jiraan khalad ku yimid cod-bixinta qarsoodiga ah ama codadka la riday ay ka badan yihiin tirada xubnaha jooga, Guddoomiyaha wuxuu burinayaa natiijada cod-bixinta wuxuuna isla markiiba qabanayaa cod-bixin kale oo cusub. Natiijada cod-bixin kasta waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha isago sheegaya tirada codadka ogolaaday ama diiday iyo codadka halaabay.

## QODOBKA 29-AAD: HABKA DOODA IYO ANSHAXA XUBNAHA GOLAHA:

1. Xubin kasta oo Golaha ka tirsan wuxuu xaq u leeyahay/leedahay in si xor ah u cabiro/cabirto Lana xurmeeyo ra'yigiisa/ra'yigeed marka Golaha laga dhex doodayo.
2. Iyadoo la fulinaayo faqradda kor ku xusan, xubnaha Golaha waa in ay si hagaagsan ugu dhaqmaan qodobada so socda:-
   - Xubin kasta waxaa laga doonayaa in ay fekerkeeda u cabirto si kooban oo cad iyadoon ka baxayn qodobka laga hadlayo, laguna celcelin ereyo isku mid ah, ilaalinaysana waqtiga la siiyay.
   - Xubin walba Waxaa waajib ku ah in ay run ka sheegto qodobka ay ka hadlayso.
   - Waxaa waajib ku ah xubin kasta in uusan hadalkeedu xiisad kicineyn, khalkhalna gelineyn wadanka, Shacabka iyo Golaha intaba.
   - Xubin kasta waa in ay ilaalisaa Haybada iyo sharafta Aqalka, Xasaanada xubnaha iyo Ha'adaha kale.
3. Soo jeedinta xubin walba waa in ay ku salaysan tahay mabaadiida iyo fikradaha uu tageeraayo ama kaga hor imaanaayo, iyadoo la dhawraayo xubnaha kale.
4. Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo dhexgal, gunuunuc,qaylo, sacabin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah.

5. Xubina ma hor keeni karto Golaha ra'yi aan waafaqsanayn Ajendada kulan maalmeedkaas horyaal, hadaanu ogolaan Guddomiyuhu.

6. Xubina kama bixi karto fadhiga, ka dib markii ay jeediso ra'yigeeda, fasax la'aan.

7. Xubina kuma qaybin karto kulanka gudihiisa hadal qoraal aanu fasaxin Guddoomiyuhu.

8. Waxaa ka reeban xubnaha in ay qalalaaso ku sameeyaan Golaha iyo agagaarkiisa toonna.

9. Waxaa reeban in xubnuhu u tanaagoodaan ama u il jebiyaan martida Golaha fadhida.

10. Waxaa reeban in laga baxo fadhiga marka Guddomiyuhu hadlayo ama ay socoto cod bixin.

11. Waxaa reeban in lala yimaado, calaamado, qoraalo, Hal ku dhigyo iyo dhawaaq muujinaya is hortaag hawlaha Golaha.

12. Xiliga uu hoogaaminayo Guddomiyuhu Shirka looma tegi karo waxna looma sheegi karo, xoghaynta ayaa wixii qoraal ah loo marinayaa.

13. Xubintii rabta in ay hadal jeediso waxay raacaysaa talaabooyinkan:

    b) xubin walba waxay ku bilaabaysaa hadalkeeda" Mahadsanid Guddomiye"

    t) Waxay isticmaalaysaa "Senator" marka ay tilmaamayso xubin kale, ama Mudane/Marwo marka ay sheegayso qof kale oo madaxda ka mid ah.

14. Xubintii rabta in ay hadasho waxay taageysaa gacanta iyadoo aan qaylin, kicin ama ficil kale sameyn.

15. Xubina ma hadli karto, calaamadna kuma muujin karto Ra'yigeeda haduusan Guddomiyuhu u ogolaan.
16. Xubintii hadasha ayadoon Guddomiyuhu u ogolaan wuu ka joojinayaa hadalka, wuxuuna hadalka siinayaa cidii ku xigtay.

## QODOBKA 30-AAD: HAB DHAQANKA XUBNAHA XILIGA FADHIGA

1. Xubina kama hadli karo, Golaha haddii usan fasax ka helin Guddoomiyaha
2. Xubintii Golaha la hadlaysa waa in ay istagtaa, haddii usan/aysan awoodin Guddomiyaha ayaa u ogolaan kara in uu fadhiga kula hadlo Golaha.

3. Dhamaan Xubnaha kale waa in ay aamusaan markii Senator uu Golaha la hadlayo.
4. Marki uu Senatorku dhameeyo la hadlida Golaha waa in uu fadhigiisa ku noqdaa.
5. Senator sameynayo hadal & dhaqdhaqaaq inta dooda shirka socoto Gudoomiyuhu wuxuu ku amrayaa inuu joojiyo.
6. Senatorkii ku adkeysta in uu qas sii wado Guddomiyuhu wuxuu amrayaa in uu ka baxo fadhiga.
7. Hadduu u hogaan sami waayo amarka Gudoomiyaha wuxuu Guddomiyaha amrayaa in laga saaro fadhiga asagoo adeegsanaya Habdhowraha iyo ciidanka amniga, waxaana laga joojinayaa fadhiyada Golaha muddo seddex kulan oo isku xigta.
8. Haddii uu u hogaan sami waayo awaamirtaas raali gelina bixin waayo waxaa loo gudbinayaa Guddiga anshaxa si looga qaado Talaabada ku haboon.

## QODOBKA 31-AAD: HADAL JEEDIN

1. Waxaa hadal jeedin leh Xubin kasta oo ka tirsan Aqalka Sare oo is diwaan galiyay/gelisay Guddoomiyuhuna fasaxay.
2. Xubinta codsanaysa in la siiyo hadalka waa in uu wargaliyaa xoghayaha, Gudoomiyaha Golaha ayaa siinaya xubnaha hadalka asagoo raacaya sida ay u kala horreyaan.
3. Xubin ka tirsan Golaha kama hadli karto arrin ku saabsan hal mowduuc in ka badan hal mar, haddii arrintaas aysan aheyn mid shakhsi ah oo isaga saameyneysa, ama la xiriirta Xeer-hoosaadka ama cadeyn ku saabsan arrin aan hore looga hadlin lana
4. xiriirta mowduucaas.
5. Haddii xubin loo digo in ka badan labo jeer sabab la xiriirta ka bixida mowduuca laga doodayo ama aanan hadalkiisa ku dhameysan mudDada la siiyey sida ku xusan faqrada 2aad, Gudoomiyuhu waxuu ka joojinayaa hadalka.
6. Ka hadalka arrimaha Ajendaha kama badnaanayo shan (5) daqiiqo.
7. Haddii si kale uusan u go'aansan Goluhu, hadalka senatorka Golaha kama badnaan karo toban (10) daqiiqo.
8. Guddoomiyaha Golaha ayaa u oggolaan kara xubin inay hadasho waqti ka badan muddada loo cayimay haddii uu u arko macquul .

## QODOBKA 32-AAD: DHEXGAL TOOSINEED (POINT OF ORDER)

1. Xubin kasta waxay codsan kartaa dhexgal toosineed iyadoo ay xubno kale hadalkooda wataan.
2. Dhexgal toosineed waxay imaanaysaa marki uu Senator jebiyo Xeer-hoosaadka, ka baxo mowduuca laga hadlayo, ama uu bixiyo xog khaldan.

3. Guddomiyaha wuxuu siini karaa fursad xubinta ka codsata dhexgal toosineed (point of order) haddii uu u arko inay haboon tahay.
4. Marka la aqbalo codsiga dhexgal toosineedka (point of order), xubinta waxay si toos ah uga hadlaysaa qodobka uu u istaagay/istaagtay isagoo/iyadoo soo koobaya/koobaysa, kuna ekaanaya qodobkii uu u istaagay.
5. Xubin walba ayaa codsan karta ama u istaagi karta dhexgal toosineed markii uu senator buriyo Xeerka u degsan, habraacyada iyo dhaqamada Golaha.
6. Xubin walba ayaa codsan karta ama u istaagi karta cadayn kadib marki uu Senator si kale u fahmo hadal uu u jeediyay Golaha uuna u sharxo sida uu ula jeeday hadlkiisa.
7. Marki la soo jeediyo dhexgal toosineed ama toosin habraac , Senatorkii hadlayey waa in uu fariisto ilaa Guddoomiyuhu go'aan ka gaaro.

## QODOBKA 33-AAD: XAQA AY XUBINTA U LEEDAHAY JAWAAB CELIN

1. Xildhibaan ama Wasiir kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab deg-deg ka bixiyo dood/hadal lagu xusay magaciisa.
2. Xaqa jawaab celinta ee ku xusan kor (1 ) waxaa lagu xadidayaa shan (5) daqiiqo,
3. Haddii Senator ama Wasiir isticmaalo xaqa jawaab celinta sida ku xusan (1), waxaa loo ogolyahay xubintii jawaab celinta laga qaatay, is-difaacid ku kooban laba daqiiqo.

## QODOBKA 34-AAD: KA DOODISTA HINDISE SHARCIYEED IYO SOO JEDINTA SI GO'AAN LOOGA GAARO:

Aqalka Sare wuxuu ka doodaa Hindise Sharciyeed iyo Soojeedin.

**Hindise Sharciyeedyada**

b) Ka doodista Hindise Sharciyeedyada waxay u kala horeynayaan sida soo socota:

- Hay'adda/cidda keentay Hindise Sharciyeedka ama soo jeedinta .
- Guddoomiyaha Guddiga ay khuseyso Hindise Sharciyeedka.
- Guddomiyaasha Guddiyadda joogtada ah
- Haddii aaney Xukuumadu keenin Hindise Sharciyeedka Golahu wuxuu Xukuumada weydiin karaa aragtideeda/fikerkeeda.
- Xubnaha kale ee Golaha waxay u hadlayaan sida uu u kala siiyo hadalka Guddoomiyuhu.

t) Kadib markay doodda dhamaato, cida keentay Hindise Sharciyeedka ama mooshin waxay xaq u leedahay in ay jawaab bixiso. Intaa kadib Guddoomiyaha Golaha ayaa soo xiraya dooda isagoo dalbanaya codeynta xubnaha Golaha ee ku aadan Hindise Sharciyeedka ama soo jeedinta.

**Soo jeedinada Qaraarada:**

1. Arrin walba oo u baahan codka Golaha waa in loo soo bandhigaa qaab soo jeedin.
2. Soo jedinadu waxay u qaybsamaan, soo jeedin Habraac iyo soo jeedin Nuxur.
3. Soo jedintu waxay noqon kartaa mid khusaysa Habraaca Golaha isla markana soo jeedintedu aysan u baahnayn wax wargelin ah. Waxaana ka mid ah :
    - ❖ Soo jedin in fadhiga dib loo dhigo malinta xigta.
    - ❖ Soo jedin in doodda dib loo dhigo malinta xigta.
    - ❖ Soo jedin dhexgal toosineed ayadoo dood socota.
    - ❖ Soo jeedin in la xiro doodda lana codeeyo.
    - ❖ Soo jeedin in la xaqiijiyo Guntanka.
    - ❖ Soo jeedin in qodob/ qodobo Xeer-hoosaadka aan lagu dhaqmin ( la laalo) si ku meelgaar ah inta lagu guda jiro arin ama dood.
4. Soo jeedintu waxay noqon kartaa mid Nuxur una baahan in Golaha la soo wargeliyo inta aan la soo jeedin.
    - ✓ Soo jeedin Hindise Sharciyeed ama qaraar.
    - ✓ Soo jeedin wax ka bedel Hindise Sharciyeed ama qaraar.
    - ✓ Soo jeedin Heshiis Caalami.
    - ✓ Soo jeedin wax ka bedelid Dastuurka.
    - ✓ Soo jeedin wax ka bedelid Xeer-hoosaadka.
    - ✓ Soo jeedin eedayn Madaxwayne.
    - ✓ Soo jeedin kalsooni kala noqosho Ra'iisul Wasaaraha.
5. Soo jedinta Nuxur waxaa soo jedin kara
    b) Golaha Wasiirrada
    t) Senatorka Golaha haddii usan Xeer-hoosadka si kale u qeexin.
6. Soo jedinta Nuxur waa in ay ahaataa mid qoraal ah loona gudbiyaa Guddomiya Aqalka Sare ka hor 24 saacadood inta aan fadhiga Golaha la keenin.
7. Guddomiya Golaha waa in usan aqbalin soo jeedin ka hor imanaysa Shareecada islamka, Dastuurka, ama Xeer-hoosaadka Golaha iyo Shuruucda kale ee dalka.
8. Inta aan la furin doodda soo jedinta , qof ka tirsan soo jediyayaasha soo jedinta ayaa Golaha u akhrinya ujeedoyinka soo jeedinta.
9. Goluhu waa in uusan u gudbin Soo jeedin Nuxur asagoo aan dhamayn soo jedin Nuxur oo horey Golaha loogu soo gudbiyay.
10. Inta lagu guda jiro doodda, soo jeedinta Habraaca aya mudnaanta ka leh soo jeedinta Nuxur.

## QODOBKA 35-AAD: HADAL-JEEDINTA WASIIRRADA

Fadhi kasta oo Golaha u dhanyahay, codsi uu ogolaaday Guddoomiyaha Golaha ka dib, Wasiir kasta wuxuu ka hadli karaa arrin kasta ee hoos imaaneysa xeyn-daabka waajibaadkiisa. Kadib markuu hadalka jeediyo, Guddoomiyaha Golaha wuxuu ogolaanayaa wixii fikir ku biirin ah ama su'aal ah ee Goluhu uu qabo ama xubin ka mid ah Golaha. Wasiirka hadalka jeediyay wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab kooban ka yiraahdo wixii fikir ku biirin ah ama su'aal ee loo soo jeediyay.

## QODOBKA 36: NIDAAMKA FADHIGA GOLAHA

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa ilaalinaya nidaamka Golaha. wuxuuna fari karaa inuu nidaamka ilaaliyo xubin kasta oo Golaha ama Xukuumadda ka tirsan markii:-

- Xubin hadleysa ay ka baxdo arrintii dooda u furneyd.
- Xubin ay ku kacdo fal carqaladeynayo nidaamka shaqada Golaha.
- Xubin ay ku kacdaa anshax xumo ama dhaqan aan habooneyn.
- Xubin isticmaasha luqad hadal ahaan iyo qoraalba aan ku habooneyn golaha.
- Xubin hurisa colaad, isticmaasha luqad ay ku dheehan tahay anshax-xumo,
- gaf, sharaf-dil, hanjabaad iwm.
- Xubin garab marta ama ixtiraami waydo awooda xilgudashada Guddoomiyaha Golaha.
- Xubin si ula kac ah ku Gardaroota ama hor istaagto Habdhowraha oo fulinayo amarka Guddoomiyaha Golaha.

2. Xubin ama Wasiir waa inay u hogaansanaato amarka uu bixiyo Guddoomiyaha Golaha ee ku saabsan hab dhaqanka loogu baaqay xubintaas ama Wasiirkaas inay dhowrto, kuwaas oo ay ka mid yihiin tallaabooyinka soo socda:

b) Ka noqoshada isticmaalka luuqad aan Golaha ku habooneyn

t) In uu islamarakaas soo afjaro hadalka

j) fadhiyada Aqalka Sare oo laga saaro oo ay ka mid yihiin kulammada Guddiga inta maalintaas ka harsan

x) In la demiyo ama codka laga xiro telefoonada gacanta waqtiga uu socdo fadhig Golaha

3. Haddii Goluhu dhexdiisa uu ka dhasho nidaam darro aad u baaxad weyn, Guddoomiyaha Goluhu wuxuu islamarkaaba dib u dhigi karaa fadhiga maalinta xigta.

## QODOBKA 37-AAD: DAAH FURNAANTA FADHIYADA GOLAHA

1. Haduusan Golaha si kale u go'aamin, fadhiyada Golaha waxay u furan yihiin dadweynaha. Fadhiyada Golaha waa laga baahinayaa warbaahinta haddaan Goluhu si kale u go'aamin.
2. Martida loo ogolaaday in ay ka qeyb-galaan fadhiga waa in ay fadhiistaan meel khaas ah oo ka soocan kuraasta xubnaha. Waana inay aamusnaadaan, ayna muujin calaamad aqbalaad ama diidmo ah. Hab dhawraha ama ku xigeenkiisa ayaa markuu Guddoomiyahu amro ka dib dibbeda u saaridoona cidii u hogaansami waydo nidaamka Golaha.
3. Dadka loo ogolaaday in ay dhageysataan doodaha waa In ay haystaan kaarka martida oo ayna muujiyaan waqti kasta lagana aruuriyo dhamaadka fadhiga ka dib ama haddii dibedda loo saaro sida ku xusan farqada 2aad ee qodobkan loona sheegaa saraakiisha amniga si dacwad loogu qaado.
4. Marti/dhageeyste kasta oo u gefa sharafta iyo karaamada Golaha ama xubin ka tirsan Golaha waxaa lagu wareejinayaa saraakiisha amniga si tallaabo Sharciga waafaqsan looga qaado.
5. Guddiga Joogatada Arrimaha Golaha wuxuu soo saari karaa Xeer ku aadan hab-dhaqanka dadweynaha, wakiilada ka socda saxaafada iyo ciddii kale oo dhageysanaysa fadhiga Golaha. Guddoomiyaha Golaha wuxuu ku amrayaa cidii u hogaansami waydo Xeerarkani in ay ka baxdo dhismaha Golaha. Hay'adaha amniga ee Aqalka Sare waa in ay islmarkiiba fuliyaan amar kasta ee kasoo baxa Guddoomiyaha Golaha ee arrintan ku saabsan.

## QODOBKA 38-AAD: AMNIGA AQALKA SARE

1. Waa waajibaadka Guddoomiyaha inuu hubiyo amniga Golaha Aqalka Sare. Guddoomiyuhu wuxuu amri karaa Hab-dhawraha inuu qaado tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagu xallinayo xaalad iyadoo la isticmaalayo ciidanka amniga.
2. Waxaa ka reebban qof-kasta inuu dhismaha Golaha la galo hub iyo wixii kale oo amniga wax yeeli Kara. Haddii xubin Golaha ka tirsan uu diido inuu hubka ku wareejiyo ciidamada amniga, mid ka mid ah hab-dhawrayaasha ayaa la ogeysiinayaa. haddii xubintaa ay ku sii adkeysato in ay dhinac marto amarka hab-dhowraha waxaa arrintaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha si uu xubintaa tallaabo haboon uga qaado.
3. Ciidanka amniga ma gali karo xarunta Golaha haduusan Guddoomiyaha ka codsan in ay soo galaan.

4. Cid kale oon ka aheyn xubnaha iyo shaqaalaha maamul ee Golaha ma gali karaan xarunta Golaha haddii aysan fasax ka haysan Hab-dhawraha.

## QODOBKA 39-AAD: KEYDINTA & XAFIDAADA HADAL QORAALKA FADHIYADA GOLAHA

1. Hadal qoraalka (minutes) , codka iyo muuqaalada (recording &vidoes) ayaa noqonaya keydinta rasmiga ah (official record), waxa uu qabtay Goluhu waxaana diyaarinaya Xoghayaha guud ee Golaha Aqalka Sare.
2. Hadal qoraalada fadhiga Golaha waxaa saxeexaya Xoghayaha Aqalka Sare ee shaqada ku leh si u uu xaqiijiyo hadal qoraalkuna in uu saxan yahay.
3. Hadal qoraalada Golaha waxaa lagu xusayaa:

- ✓ Lambarka fadhiga.
- ✓ Waqtiga iyo goobta fadhiga lagu dhigay.
- ✓ Cidda Guddoominaysay fadhiga.
- ✓ Xubnaha kasoo qayb galay, haddii ay joogeen ilaa gabagabada fadhiga ama ay ka joogeen qayb kaliya.
- ✓ Xubnaha maqan ee fasax qaatay.
- ✓ Xubnaha maqan ee aanan fasax qaadan.
- ✓ Ajendaha maalintasi.
- ✓ Soo koobidda Arrimaha laga hadlay iyo go'aamada la qaatay fadhiga.
- ✓ Waqtiga la xiray fadhiga.

4. Go'aamada Guddomiyaha ee la xiriira habraaca ogolaashaha soo jeedimada inta uu fadhigu socday.
5. Hadal qoraalka waxaa ansixinaya Golaha fadhiga xiga ee Golaha. Haddii la waayo xubin ka soo horjeeda, hadal qoraalka waxaa loo qaadanayaa in si wada jir ah loo ansixiyey. Kaliya xubnaha soo jeedinaya wax ka beddel ama faahfaahin fikradooda ayaa ka hadli karo hadal qoraalka.
6. Nuqulka rasmiga ah (original copy) ee hadal qoraalka waxaa keydinaya Xoghayaha Guud ee Golaha.
7. Hadal qoraalka waxaa loola jeedaa kayd qoraal oo koobaya waxa laga hadlay.
8. Duubista codka & muuqaalka waxaa loola jeedaa dhamaan duubista waxa laga yiraahda fadhiyada buuxa iyo kuwa guddiyada.
9. Gabagabada fadhi kasta, hadal qoraalada iyo dokumiindiyada kale (other records) waxaa lagu keydinayaa keydka Golaha iyo bogga internetka loona fasaxaya dadweynaha sida uu Sharcigu farayo.

## QODOBKA 40-AAD: XUSHMADA ISTAAGA IYO FADHIGA GOLAHA

1. Xubnaha waa inay istaagaan marka dadka hoos ku qoran soo galaan Golaha:

   b) Madaxweynahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya.

   t) Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ama sii hayaha xilkiisa iyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

   j) Madaxweyne shisheeye ah ee lagu martiqaaday ama wakiilkiisa.

   x) Guddoomiye Barlaamaan ee dal kale

   Kh) Marka la fadhiyo Golaha, Guddoomiyaha, labada Guddomiye kuxigeen iyo xubin kasta oo uu Guddoomiyuhu ku marti qaaday fadhiga waxaa ay fadhiisanayaan xubnaha hortooda. Hab dhowraha, ku-xigeenkiisa iyo xoghayaha waxaa ay fadhiisanayaan meel ka hooseysa meesha uu fadhiyo guddoomiyaha. Xubnaha dowladu waxaa ay fadhiisanayaan dhinaca bidix ee ka soo horjeeda Guddoomiyaha.

## CUTUBKA 7-AAD: HABRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA

## Qodobka 41-aad: Curinta Hindise Sharciyeedka

1. Sharciyada qabyada ah waxaa Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah u soo bandhigi kara:

- Ugu yaraan xubnaha matalaya hal aamul oboleed.
- Ugu yaraan shan iyo toban xubnood (15) oo ka mid ah Golaha Aqalka Sare.
- Guddi kasta oo ka mid ah Guddiyadda Aqalka Sare.

## QODOBKA 42-AAD: SOO BANDHIGIDA SHURUUC DEG-DEG AH

1. Guddi kasta oo Guddiyada Golaha ka mid ah ayaa soo bandhigi kara wax ka beddel Sharci ama qabyo qoraal Sharci ee deg deg ah.
2. Xubnaha matalaya hal Dowlad Goboleed oo xubin ka ah Dowlada Federaalka Soomaaliya.
3. Ugu yaraan shan iyo toban xubnood oo ka tirsan Golaha Aqalka Sare.

## QODOBKA 43AAD: SOO BANDHIGGIDA IYO AKHRINTA HINDISE SHARCIYEEDKA

1. Hindise Sharciyeed walba (Sharci qabya ah) wuxuu la xiriira soo jeedin codsi ogolaansho oo qaab soo jeedin leh (**motion for leave**) halkaas oo ay ku caddahay tilmaanta Hindise Sharciyeedka

2. Guddi ama Wakiil Dowlad Goboleed waxay Golaha u soo bandhigi karaan Hindise Sharciyeed Bilaha ugu horreeya ee Kalfadhiga.

3. Soo jeedin (Motion) soo bandhigaysa Hindise Sharciyeed cusub. waxay ka gudbeysaa akhrinta koowaad iyadoo aan laga keenin wax dood ah, wax-ka-bedelid ama su'aal.
4. Hindise Sharciyeed kasta (sharci qabyaa) ee la keeno Aqalka Sare waa in ay ku lifaaqan yihiin rrimaha soo socda:
    a. b) Faahfaahin ku saabsan arrimaha Sharcigu xalinayo, ujeedooyinka iyo saameynta Sharcigu xambaarsan yahay iyo in uu waafaqsan yahay Dastuurka.
    b. t) Caddeyn ku saabsan saameynta dhaqaale ee sharcigu leeyahay sanadka kowaad iyo mustaqabalka.
5. Qabyo qoraalka Sharci waa in afartan iyo siddeed saac (48) ka hor loo qeybiyaa xubnaha Aqalka Sare.

## QODOBKA 44-AAD: SADDEX JEER AKHRINTA HINDISE SHARCIYEED

1. Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Aqalka Sare sadex jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor intuusan ansax noqon.
2. Akhrinta koobaad waxaa akhrinaya cidii keentay Hindise Sharciyeedka, akhrinta labaad (oo ah Xiliga soo jeedinta warbixinta Guddiga iyo doodda Golaha) iyo sedaxaad oo ah akhrinta nuqulka Hindise Sharciyeeedka oo dhamaystiran oo ay ku jirto talo soo jeedintii xubnaha Aqalka Sare waxaa akhrinya Guddiga ay Howshiisu la xiriirto Hindise Sharciyeedkaas waana loo codeynayaa.
3. Hindise Sharciyeedku marka uu ka gudbo Akhrinta koobaad waa in loo gudbiyaa Guddiga ay hawlihiisu la xariiraan, ka hor inta aan soo jeedin (motion) wax ka beddelidna aan lagu sameyn.
4. Inta Akhrinta koobaad ee Hindise Sharciyeedka laga hor akhrinayo Aqalka Sare, doodda Goluhu waa in ay ku koobnaato mabaadi'da Guud iyo ujeedada Hindise Sharciyeedka sida ku xusan qodobka 44aad (1&2).

## QODOBKA 45-AAD: U-GUDBINTA HINDISE SHARCIYEEDKA GUDDIGA U-XIL-SAARAAN

1. Marki uu Hindise Sharciyeedku ka soo gudbo akhrinta koowaad, waa in si dhaqsa ah loogu gudbiyaa Guddiga (u-xilsaaran) si uu uga doodo ugana talo bixiyo isagoo la kaashanaya cid walba oo aqoon u leh ama uu khuseeyo Hindise Sharciyeedka ka dibna dib ugu soo celiyo Golaha.
2. Marka uu Guddigu ka doodayo Hindise Sharciyeedka, qodobada waxaa looga doodayaa sida ay u kala horreeyaan.

## QODOBKA 46-AAD: SOO-CELINTA WARBIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA EE HEERKA LABAAD.

1. Aqalka Sare waa in lagu wargeliyaa wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee Guddiga ku dhaqaaqay. Hindise Sharciyeed walba ee Guddi soo bandhigo, wax ha laga beddelo ama yaan laga beddelin, waa in loo soo gudbiyaa Aqalka Sare iyadoo ay la socoto warbixin qoraal ah.

2. Warbixinta mid ka mid ah Guddiyada Goluhu uu ka bixiyey Hindise Sharciyeed hore loogu gudbiyey si loo mariyo akhrinta labaad, lagama doodi karo (2) labo maalmood ka hor laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha.

## QODOBKA 47-AAD: WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE SHARCIYEEDKA KA DIB WARBIXINTA GUDDIGA

1. Ujeedada qodobkani ee la xariirta wax-ka-bedelidda Hindise Sharciyeedka heerka soo jeedinta Warbixinta Guddiga waxaa loola jeedaa in xubnaha aan ka mid ahayn Guddiga ka baarandegay Hindise shirciyeedka ay fursad u helaan wixii soo jeedin ah ama wax-ka-bedelid mucayin ah ee loo baahanyahay, taasoo ah wixii ka dhimanaa howshii Guddigu hore u soo qabtey.

2. Senatorada aan kamid ahayn Guddiga kasoo shaqeeyay waxay u gudbin karaan waxka beddelka Hindise-Sharciyeedka ugu danbeyn afar maalin ka hor inta aanan Hindise-Sharciyeedka loo waqtiyeynin.

3. Guddoonka Aqalka Sare awood ayuu u leeyahay in uu kala qaado ama isku daro talooyin wax-ka beddelid ama qodobo kala duwan marka lagu guda jiro doodda Warbixinta Guddiga. Wuxuu kaloo awood u leeyahay, haddi uu u arko sidaas, in uu ka codsado xubinta soo jeedisay wax-ka-bedelidda in ay ka bixiso faahfaahin kooban si Guddoonka fikir uga qaato.

4. Guddoomiyuhu uma soo jeedin karo Aqalka Sare qodob wax-ka beddelid ah oo hore Guddiga u xil-saaran Hindise Sharciyeedku u arkay mid aan waafaqsaneyn sharciga, Guddoonka wuxuu talo ku dari karaa wixii ay ula muuqato in Guddigu ka gaari waayay.

5. Guddoomiyuhu wuxuu Golaha u soo bandhigi karaa (si looga doodo) soo jeedin wax ka badalid oo hore ay u diideen Guddiga u xil saarnaa, haddii uu u arko mid muhimadeeda leh, mudana in tix gelin dheeraad ah la siiyo, haddii aysan Guddigu soo jeedintaas ku diidin ka hor imaasho Sharci.

6. Guddoonka ma aqbali karo codsi dood gelin, wax ka beddelid la xiriirta oo keeni karta qas iyo iska hor keenid, lehna dabeecad soo noqnoqosha ama ujeedada laga leeyahay ay tahay in si macna darra ah loogu dheereeyo hannanka dib-u-eegista dooda ee Warbixinta Guddiga.

## QODOBKA 48-AAD: HABKA DOODA WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE SHARCIYEED

1. Soo jeedin walba ee wax-ka-bedelid ah oo wargelinteedu waafaqsan tahay Xeer-hoosadka waa laga doodi karaa waxna waa laga bedddeli karaa.
2. Haddii la ogolaado in laga doodo warbixin Guddi, xubin walba waxaa loo ogol yahay in ay hadasho mar qura, waqti aan ka badneyn 15 daqiiqado iyadoo xaq u yeelaneysa soo jeedin wax-ka-bedelid kasta ee Warbixinta Guddiga.
3. Doodda la xirriirta wax-ka-beddelid Hindise Sharciyeed dib ayaa loo dhigi karaa muddo asbuuc ah haddii sidaas ay codsadaan ugu yaraan 10 xubnood oo ka duwan xubnihii soo bandhigay wax ka beddelidda ama inta badan xubnaha Guddiga ku shaqada leh. Soo jeedinta dib u dhigista waxaa la gelinayaa Cod.
4. Guddoomiyuhu wuxuu u oggolaan karaa seddax (3) Xubnood in ay ka hadlaan wax ka beddelka Muddo aan ka badnayn todoba (7) daqiiqo wax ka beddelkiiba.
5. Marka qodob walba laga doodo Guddoomiyuhu wuxuu gelinayaa Cod qodobkii laga doodaba ama in codka loo qaado hal mar qodobadii Sharicga ka kooban yahay oo dhan.
6. Marka Sharci qabyo ah oo akhrinta labaad maray, lagu sameeyo wax ka bedel ama dood inta lagu jiro sidaas si la mid ah ayuu marayaa xilliga Akhrinta seddaxaad.

## QODOBKA 49-AAD: SOO-JEEDINTA GABAGABADA HEERKA WARBIXINTA

Marka ay soo gabagabowdo ka doodidda Hinisde Sharci laba goor akhris maray , waxaa la soo gudbinayaa soo jeedin (motion) ku aadan ogolaanshaha wax ka beddelka Hindise Sharciyeedkaa ama in sidiisa loo qaato.

## QODOBKA 50-AAD: AKHRINTA SADEXAAD EE DOODA AMA WAX-KA-BEDDELID KA DIB

1. Haddii Hindise Sharciyeed Golaha laga hor-akhriyey laba jeer, waxna laga bedelay ama dood la geliyey waqtiga warbixinta Guddiga la soo bandhigayey, waa in loo gudbiyaa akhrin sadexaad. kadibna lagu ansixiyaa afar maalmood gudohood.
2. Marka Hindise Sharciyeedka ka gudbo akhrinta sedexaad Qodobada la doonayo in wax laga beddelo waa in lagu wargeliyaa Gudoomiyaha Aqalka Sare iyadoo qoraal ah, Kaasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan 10 Xubnood, 24 saac ka hor inta aan la ansixin Hindise Sharciyeedka.
3. Wixii soo jeedin wax ka-beddelid ah ee ku saabsan Hindise Sharciyeed la hor keenay Golaha waa in loo qeybiyaa Xubnaha Golaha iyadoo qoraal ah. Haddii xubinihii soo bandhigay ka noqdaan wax ka beddelkii ay soo jeediyeen, xubin kasta oo Golaha ayaa soo jeedin karta isla wax-ka-beddelkii oo uu ka noqday soo jeediyihi hore.

4. Haddii Guddoonka Aqalka Sare uu u arko wax-ka-bedelid Hindise Sharciyeed mid aan Sharciga waafaqsaneyn waa in lagu celiyaa xubnihii soo bandhigay.
5. Haddii 5 xubnood ay isla soo bandhigeen soo jeedin wax-ka bedelid Hindise Sharciyeed, Guddoonka ayaa tilmaamyo Xubinta soo jeedin doonta wax-ka-bedelidaas.

## QODOBKA 51-AAD: HUBINTA HIDISE-SHARCIYEEDKA

1. Marka Hindise Sharciyeed la ansixiyo laguna daro waxka beddalada la qaatay, waa in dib loogu celiyo Guddiga shaqada ku leh si ay u hubiyaan in waxka beddaladaas sidii ay ahayd loogu daray. Guddigu ma sameynayo wax ka beddel cusub ama dood midna.
2. Marka Guddigu hubiyo in Hindise Sharciyeedku saxanyahay waa in loo mudeeyaa akhrinta seddaxaad.
3. Ka hor akhrinta seddaxaad xubnaha waa in loo qaybiyaa nuqulka Hindise-sharciyeedka ugu yaraan seddax maalin ka hor.
4. Marka akhrinta seddaxaad la joogo, Hindise Sharciyeedka waa in loogu codeeyaa si Guud, in la oggolaado ama la diido iyadoon laga doodin waxna laga beddalin.

## QODOBKA 52-AAD HINDISE SHARCIYEED SUGAYA SAXEEXA

Hindise Sharciyeed qabyo ah wuxuu dhaqan galayaa ka dib marka uu maro habraaca Sharci dejinta ee ku xusan qaybtan Madaxweynaha Jamhuuriyadu saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah sida ku xusan qodobka 85aad ee Dastuurka.

## QODOBKA 53-AAD: HINDISE SHARCIYEEDKA LA DIIDAY

Sharci qabyo ah oo Goluhu diiday dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay kasoo wareegto 30 Maalmood laga bilaabo maalintii uu Goluhu diiday siduu qoraayo qodobka 75-aad faqradiisa 4aad ee Dastuurka.

## QODOBKA 54-AAD : FAAFINTA IYO XAFIDAADA SHARCIYADA

Keydka Sharciyada Dowlada iyo faafintooda waxaa Masuul ka ah Xoghayayaasha labada Gole iyo Garyaqaanka Guud ee Dowlada oo faafinta rasmiga ah ku sameynaya, sida ku Cad Qodobka 84aad ee Dastuurka.

## QODOBKA 55-AAD: DURID SHARCI

1. Sharci Maray habraaca Ansixinta Sharciyadda dhaqangelidaba waxaa lagu duri karaa keliya inuu kasoo hor jeedo Shareecada islaamka iyo Dastuurkaba.
2. Sharci maray shuruudaha ku xusan Cutubkan waxaa duri kara:

- ✓ Golaha Aqalka sare BFS, isagoo isku dhan ama ergo Hal Dowladaha Xubinta ka ah JFS ka mid ah sida ku cad qodobka 86aad ee Dastuurka.

## QODOBKA 56-AAD: NIDAAMKA HABRAACA ISU GUDBINTA HINDISE-SHARCIYEEDYADA LABADA GOLE.

Marka labada Gole isu gudbinayaan Sharciyo waxaa la marayaa habraacan soo socda:

1. Goluhu wuxuu raacaya isla habraaca seddex jeer akhrinta Hindise Sharciyeedka sida Golaha Shacabku sameeyo.
2. Marka mid ka mid ah labada Aqal uu wax ka beddel ku sameeyo Hindise Sharciyeed ka soo gaaray Golaha Kale, waa in seddax maalin gudahood loogu gudbiyo Aqalka kale Nuqulka Wax ka beddalka oo uu saxiixay Xoghaya Guud Guddoomiyuhuna ku waafaqay.
3. Wax ka beddalka Hindise Sharciyeedka ka soo billawday Golaha Kale waa in loogu qaybiyaa Xubnaha seddax Maalin gudahood marka la keeno, waana in looga dooda Kulanka Guud ee Golaha.
4. Ka doodista wax ka beddelka Hindise Sharciyeedka ka soo billawday Gole kale waa inuu ku billawdaa qaab soo jeeedin ah, "in wax ka beddalka Hindise Sharciyeedka laga doodo"
5. Wax ka beddal kasta waxaa akhrinaya Xoghayaha Guud ka dibna waa la oggolaanayaa ama la diidayaa

## QODOBKA 57-AAD: GUDDIYADA WADAJIRKA AH

Haddii mid ka mid Labada Gole uu codsato Guddi wadajir ah sidi ku cad Qodabka 83aad Faqradiisa 7aad ee Dastuurka waxaa la raacayaa sidi soo socoto:

1. Gudoomiyayaasha labada Gole waxay wadajir u magacaabayaan Guddi ka kooban labada Aqal tiradooduna isla'egtahay.
2. Guddomiyaha iyo Ku-Xigeenka Guddiga wadajirka waxaa dooranayo aqlabiyada Xubnaha Guddiga ee jooga Kulanka Koowaad.
3. Guddomiyaha iyo Ku-Xigeenka Guddiga wadajirka ma noqon karaan Xubno kawada tirsan Hal Aqal.
4. Haddii Shan iyo Toban Maalin gudaheed Guddiga wadajirka ah ay ku heshiin wayaan Nuqulka Hindise Sharciyeedka loo gudbinyo Labada Aqal si loo ansixiyo, waxaa Hindise Sharciyeedka dib lagu soo celinyaa shir-Guddoonka labada Aqal si ay go'aan uga gaaraan.

## QODOBKA 58-AAD: DOODA WARBIXINTA GUDDIGA WADAJIRKA

1. Warbixinta Guddiga wadajirka ee Hindise Sharciyeedka waxa hor keenayaa Golaha Xubin ka mid ah Guddiga wadajirka oo uu wakiishay Guddigu
2. Haddii warbixinta Guddiga wadajirka ay tahay in Guddigu isku khilaafay Nuqulka Hindise Sharciyeedka ama Gudiga wadajirku isku raaci waayo Nuqulka Hindise Sharciyeedka Shan iyo Toban Maalmood gudahood oo ka bilaabaneysa marka loo gudbiyay, Hindise Sharciyeedka waxaa uu ku soo celinayaa shir Guddoonka labada Aqal.
3. Haddii warbixinta Guddiga wadajirka tahay in Guddigu isku raacay Nuqulka Hindise Sharciyeedka, Goluhu wuxuu uga doodayaa warbixinta Guddiga wadajirka qaab soojeedin ah " in warbixinta Guddiga wadajirka la ansixiyo " Goluhuna waa in u codeeyaa in la ansixiyo ama la diido soo jeedinta.

4. Haddii soo jeedinta Faqrada 3aad noqoto:

b) Diidmo , Xoghaya Guud ee Aqalka Sare waa in u diraa Fariin Aqalka Sare oo ku sheegayo diidmadaas, Hindise Sharciyeedkaasna waxa loo aqoonsanayaa mid la diiday.

t) Ogalaansho, Xoghaya Guud ee Aqalka Sare waa in u diraa Fariin Aqalka Sare oo ku sheegayo ogalaanshahaas,kadib marka uu Xoghaya Guud ka helo fariin Aqalka Sare oo la mid ah ogalaanshihi uu u diray , Hindise Sharciyeedka waxaa loo aqoonsanayaa in Labada Gole u ansixiyeen sida Guddiga wadajirka isugu raaceen waana in Guddomiyuhu udiraa Madaxweynaha, Hindise Sharciyeedka si uu u saxiixo.

## QODOBKA 59-AAD: KULAMADA WADAJIRKA AH EE LABADA GOLE

Si waafaqsan qodabka 57aad iyo 62aad ee Dastuurka Jamuuriyada Federaalka Somaaliya, waxaa la racayaa Habraaca soo socda kulamada wadajirka ee Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka inta Barlamaanka Federalka ka soo saarayo Xeer-hoosaadk Kulamada Wadajirka

1. Arrimaha aanan Horey u dhicin

Guddoomiyayaasha labada Gole oo wadajira ayaa ka soo saaraya habraac arrimaha uu ka aamuso Xeerarka wadaagga ah.

2. Laalid

- ✓ Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka ayaa qaraar wada jir ah ku laali kara qodobada Xeerarka wadaagga ah muddo xadidan.
- ✓ Laalidda qodob walba wuxuu ku xadidanyahay baahida keentay in laalo.

3. Ka qaybgalka Dadweynaha

- Dadweynuhu waxay ka qaybgali karaan kulamada wadajirka ah ee labada Gole
- Fadhiga laba Gole ama Guddiyada
- Dhageysiga Dadweynaha:
- ✓ Inay aragti qoraal ah ka dhiibtaan Sharciyada qabyada ah ayaga oo u gudbinayaa Guddiyada u xilsaaran howshaas,

4. Isugu yeeridda Fadhiyada Wadajirka.

- Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa isugu yeeri kara fadhi wadajir ah markuu la tashado Gudoomiyaha Golaha Shacabka.
- Madaxweynaha ayaa ka codsan kara Guddoomiyayaasha Labada Gole in la qabto kulan wadajir ah.

5. Goobta Shirka.

Kulamada wadajirka ah waxaa lagu qabanayaa Xarunta Golaha Shacabka ama Goobta uu xadido Guddoomiyaha Aqalka Sare isagoo la tashanaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

6. Maalinta iyo Waqtiga.

Waqtiga iyo Maalinta Fadhiga wdajirka ah waa in lagu wargeliyaa dhammaan Xubnaha labada Gole si waafaqsan Go'aanka Guddoomiyayaasha.

7. Shir Guddoomiyaha.

Gudoomiyaha Aqalka Sare ayaa Guddoominaya Fadhiyada wadajirka ah marka laga reebo fadhiga doorashada Madaxweynaha.

8. Anshaxa.

Marka lagu jiro Fadhiyada wadaagga ah waxaa qabanaya xubnaha labada Gole Xeerarka Anshaxa ee labada Gole Midba Xeerkiisa.

b) Markii ay labada Gole wada fadhiyaan, Nidaamka iyo Xeerarka doodda waxaa la raacayaa Xeer-hoosaadka Labada Gole ama toosinta Shir Guddoomiyuhu Go'aamiyo

t) Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka waxa ay yeelanayaan Guddiyo wadaag ah.

## QODOBKA 60-AAD: WAX KA BEDDALKA DASTUURKA

1. Xukuumadda Federaalka ama tan Dowlad Goboleedyada. xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ama codsi ay saxeexeen ugu yaraan 40,000 oo muwaadiniin ah ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax ka beddelka.
2. Mid Kasta oo ka mid ah labada Gole ayaa ka doodi kara wax ka beddalka Dastuurka.
3. Haddii badiba xubnaha Aqalka wax ka beddelka la soo jeediyay ee Dastuurka la hor keenaya ay aqbalaan wax ka beddelkaas marka koowaad ama marka xigta ee ay akhriyaan, Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamanka Federaalka ee Soomaaliya waxaa uu mid kasta magacaabayaa 10 xubnood oo Aqalkiisa ka tirsan oo ka mid noqda Guddi wadajir ah oo ka kooban labada Aqal.
4. Guddiga wadajirka ah ee lagu magacaabay hab waafaqsan faqradda 5 waxa ay :

   b) Dib-u-eegis ku samayn doonaan soo jeedinta ku saabsan wax ka beddelka;

   t) Dadka ku wargalin doonaan soo jeedinta

   j) Hubin doonaan in ay jirto fursad dad weyne oo ku filan in lagaga doodo.

   x) La tashan doonaan xubnaha dadwaynaha.

   Kh) Hubin doonaan in xubnaha dadwaynuhu helaan fursad ku filan oo ay ugu soo bandhigi karaan ra'yigooda iyo soo jeedintooda Guddiga wadajirka ah.

   d) Kala shaqeyn doonaan Sharci-dejinta Maamul Goboleedyada xubnaha ka ah federaalka iyo in lagu daro wixii Maamul Goboleedyadu soo gudbiyeen oo la is-waafajiyay soo jeedinta wax ka beddelka, goorta arrini taabanayso danaha Gobolka.
5. Laba bilood gudahood markii la magacaabay, Guddiga wadajirka ah waxay warbixin u gudbin doonaan mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah.
6. Baarlamaanka Federaalku waxaa uu aqbalayaa wax ka beddelka la soo jeediyay keliya intii lagu ansixiyey cod kama danbaysa ka dib codkaas oo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meel xubnaha ku jira Golaha Shacabka, iyo cod kama dambays ah oo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha ku jira Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.
7. Baarlamaanka, waxaa uu cod Kama dambays ah u qaadi karaa sadex bilood iyo ka badan marka ay ka soo wareegto warbixinta Guddiga wadajirka ah sida uu dhigayo faqradda (5).
8. Haddii baarlamaanku ansixiyo hal iyo ka badan oo waxka beddelada la soo jeediyay ah hab waafaqsan qodobkan iyo qodobka 136 ee khuseeya dib-u-eegista Dastuurka kama dambaynta ah, waxa loo qaadi doonaa afti Dastuurka wax ka beddelka lagu sameeyey.

# CUTUBKA 8-AAD: GUDDIYADA

## QODOBKA 61-AAD:XEERARKA GUUD EE GUDDIYADA

1. Goluhu wuxuu dhisayaa ogolaanayaana guddiyo (ayna ku jirin madaxda guddiyada) si waafaqsan qodobka 75[aad] faqradiisa 2[aad] ee Dastuurka KMG ah, isla markaana waxaa uu qeexaa waajibaadka shaqo ee Guddiyadaas, kadib marka uu Gudoomiyaha Golaha Aqalka Sare soo jeediyo asagoo la tashanaya ku xigeenadiisa;
2. Guddigu wuxuu weeydiisan karaa Xubno ka tirsan Sanatarada oo aan ka mid ahayn Xubnaha Guddiga ayagoo loo eegayo Aqoontooda iyo khibrada ay leeyihiin si ay ugala shaqeyaanGuddiga hawlo gaar ah muddo kooban kalana qeybgalaan doodaha Guddiga balse aysan ku laheyn cod.

   Guddoomiyaha Guddiga wuxuu u gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare qoraal ay ku lifaaqan yihiin magacyada Xubnaha Sanatarada uu Guddigu codsanaayo in ay kala shaqeeyaan hawlo gaar ah muddo kooban si uu Guddooomiyaha Golaha ugu soo saaro qoraal rasmi ah.
3. Marka ay jirto Duruufa gaar ah, Guddiyadu waxay wadaagi karaan qalabka iyo adeegyada la heli karo;
4. Guddomiyaha Golaha Aqalka Sare, isagoo la tashanaya ku xigeenadiisa, waxa uu magacaabaa Guddiyo u xilsaaran in ay qabtaan hawlo gaar ah, warbixintoodana u soo gudbiyo Guddoonka Aqalka Sare, si loo horgeeyo Golaha. Haddii hal shaqo ay ka wada dhaxayso dhowr Guddi, Guddiga arrinka masuulka ka ah iyo guddiyada hawshu kala dhaxayso waa inaay isku waafaqaan waqti xaddidan oo ku haboon gudbinta aragtiyadooda. Haddii ayna gaarin waqti xaddidan waxaa waqtiga go'aaminaya Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, asaga Guddoonka sidaas ku wargalinaya;
5. Hannaanka Sharciyeed ee Aqalka Sare waxaa uu saameeyaa Guddiyada si la mid ah sida uu Aqalka Sare u saameeyo.

## QODOBKA 62-AAD: WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIYADA GOLAHA

Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Aqalka Sare, marka lagu daro shaqooyinka ayaga u khaaska ah ee Xeer-hoosaadkani farayo, waxay ahaanayaan sida soo socota:

- In ay fuliyaan shaqo kasta oo Aqalku u xil saaro.
- In ay baaraan, ka doodaan, talana ka soo bixiyaan Sharciyada qabyada ah ee la hor keeno Aqalka Sare.
- In ay keenaan Sharci kasta oo qabyo ah ama qaraaro qabyo ah oo ku saabsan waxyabaha ay shaqadoodu tahay, marka laga reebo Hindise Sharciyeed la xiriira Miisaaniyadda sanadlaha.
- In ay taloka siiyaan Guddiga Misaaniyada iyo Maaliyadda, lacagta iyo illaalinta hantida Qaranka arrimaha ku saabsan mudnaanta Miisaniyadeed ee Wasaaradaha ama Hay'adaha kale ee shaqadooda hoos timaado.
- In ay baaraan talana ka bixiyaan siyaasadaha saameynta ku leh Wasaaradaha Guddiyada shaqadu kala dhaxeyso.

- In ay ka talo bixiyaan ama ay caddeeyaan arrimaha Aqalka Sare u soo gudbiyo.
- In ay keenaan doodo Barlamaanku ka yeesho oo ah arrimaha faa'iidadu ugu jirto Ummada.
- In ay qiimeeyaan, kormeeraana habka loo qabto iyo habka loo hirgaliyo Sharciyada iyo qorshayaasha Xukuumadda iyo Hay'adaha ama koox kasta oo ay Sharci ahaan shaqo kala dhaxeyso.
- In ay dib-u-eegis ku sameeyaan qorshaha kharashaadka waqtiga dhow, dhexe iyo kan fog-ba ee ha'yadda ama ha'yadaha loo xilsaaray.
- In ay bilaabaan baaritaan la xiriira shaqada Guddi kasta u xilsaaran yahay.
- In ay sameeyaan cilmi baaris ku saabsan shaqada Guddi kasta u xilsaaranyahay.
- In ay sameeyaan dadaal kasta oo ay kula falgelayaan kuna kasbanayaan bulshada rayidka ah,
- In ay Aqalka Sare ku wargaliyaan shaqooyinkooda.

## QODOBKA 63-AAD: GUDDOONKA GUDDIYADA

1. Guddi kasta ee Aqalka Sare waa inuu yeeshaa Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen iyo xoghaye oo ah hogaanka Guddiga.
2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddoonka Guddiga waa in laga dhex doortaa xubnaha Gudiga dhexdooda laguna doortaa cod aqlabiyad ah oo ka yimid xubnaha Guddiga.
3. Gudoomiyaha Guddiga ayaa saxeexaya go'aanada Guddiga. Haddii Gudoomiyuhu maqanyahay waxaa shaqadiisa qabanaya Gudoomiye ku xigeenka, haddii labadooda maqanyihiin waxaa howshooda qabanaya xoghayaha Guddiga, haddii isana maqanyahay, Guddigu qof ayay iska dooranayaan oo sii wada howsha Guddiga. Waxaana la ogaysiinayaa Gudoomiyaha Guddiga.
4. Haddi Gudoomiyaha Guddigaasi uu soo gudbiyo istiqaalo qoraal ah, haddii uu dhinto, haddii ay ku timaado xil gudasho la'aan joogto ah ama uu si joogto ah uga maqnaado kulammada Gudigiisa, Guddigu waxaa uu arrinkaas ku wargalinayaa Guddoomiyaha Golaha si ay u doortaan Gudoomiye cusub.
5. faqradda 4aad ee qodobkan, waxay sidoo kale saameynasaa Gudoomiye ku-xigeenka Guddiga iyo xoghayaha Guddiga.

## QODOBKA 64-AAD: KULAMMADA GUDDIYADA

1. Guddiyadu waa in ay si joogto ah u kulmaan isbuucii labo (2) maalmood, waqtiyada lagu jiro kal-fadhiyada Aqalka Sare, waqtiyada kulammada waxaa goynaya Guddomiyaha Guddiga, ama waxaa tala ka soo jeedinaya Golaha;

2. Guddi walba xaq buu u leeyahay in uu kulmo xitaa marka kal-fadhiga Goluhu xiran yahay;

3. Guddi kulan kale ma yeelan karo (Kama garab furi karo kulan kale) ayada oo uu socdo kulan Aqalka Sare, haddii uuna ka helin ogolaansho Guddoomiyaha Golaha;

4. Marka uu helo codsi ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) Xubnaha Guddiga, Guddoomiyuhaha Guddiga waa inuu qabtaa kulanka muddo ku siman 10 (toban) maalmood gudahood oo maalmo shaqa ah, ayadoo Xubnaha Guddiga lagu wargalinayo jiritaanka kulankaa ugu yaraan 48 saacadood ka hor. Ujeeddada laga leeyahay qodobkan awgeed, sababta loo qabanayo kulankaana waa in lagu cadeeyaa wargalinta.

## QODOBKA 65-AAD: OGEYSIINTA SHIRARKA CAADIGA AH

1. Kadib marka uu Guddoomiyaha Guddigu amro, xoghayntu waa inuu siiyaa xubin kasta oo ka mid ah guddiga ogaysiin ku saabsan kulankaas ugu yaraan afartan iyo sideed (48) saacadood ka hor kulanka, ogaysiiskaasi waa inuu ku cad yahay ajendaha shirka, waqtiga iyo goobta lagu kulmayo.
2. Xoghayaha Guddigu waa inuu u gudbiyaa qoraal ahaan Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare shir walba ee Guddigu yeesho.
3. Guddoomiyaha Guddigu waa inuu siiyaa xubin kasta oo ka mid ah gudgiga wax alaale wixii qoraallo ah (documents) ee la xiriira Ajendaha kulanka.
4. Mar kasta oo Ajende ka mid ah Ajendayaasha kulanka uu khuseeyo Wasaarad, waa in Guddoomiyaha Guddigu xaqiijiyaa in Wasaaradda qodobkaan shaqada ku leh la gaarsiiyay ogaysiin ku saabsan kulanka guddiga, ugu yaraan afartna iyo sided saacadood (48) ka hor, haddii ayna guddigu go'aansan si kale (sida in aan la ogeysiin Wasiirka jiritanka kulanka).

## QODOBKA 66-AAD: KULAMADA KHAASKA AH IYO KUWA GUUD

Shirarka guddiyadu waxay noqonayaan mabda' ahaan kuwa u furan Dadweynaha marka laga reebo xilliyada uu guddigu:

b. Ka doodayo arrimo qarsoodi ah oo taabanayo Amniga dalka.

t. Ka doodayo faafaahin ku saabsan qandaraas ganacsi oo ay ku lug-leeyihiin hay'adaha Jamhuuriyada Soomaalia iyo cid seddexaad oo looga hadlayo arrimo qandaraas oo qarsoodi ah.

j. Diyaarinayo talo soo jeedin qabyo qoraal ama dhameystiran oo ay ka mid yihiin qoritaanka warbixinta muhiimka u ah Golaha aqalka sare.

x. Uu sidaa go'aansado iyadoo lagu saleynaayo codka aqlabiyadda xubnaha guddiga.

## QODOBKA 67-AAD: AJENDAHA

1. Guddoomiyaha Guddigu asagoo la tashanaya xubnaha Guddiga waa inuu go'aamiyaa Ajendaha kulanka.
2. Guddoomiyuhu waa inuu qoraa Ajendaha kulanka asagoo tixraacaya qorshaha shaqo ee Guddiga iyo kan Golaha.
3. Gabagabada kulan kasta oo uu yeesho guddigu, waa in guddigu ka doodaa waxaa uu ku saabsanyahay kulanka xiga ee guddigu yeelan doono, waana in ay diyaariyaan nuqulka Ajendaha ee kulankaas.

4. Ka dib marka uu Guddoomiyuhu helo codsi ku aadan arrin ay tahay in laga dooddo oo ay ku saxeexan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3), xubnaha guddiga, waa in uu guddoomiyuhu qodobkaa ku daro Ajendaha.
5. Guddigu waxaa uu ku beddeli karaa Ajendaha cod aqlabiyad ah.

## QODOBKA 68-AAD: SOO XAADIRISTA KULAMADA GUDDIGA.

1. Xubintii aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga ama Guddoomiyaha Aqalka Sare oo ka maqnaado/maqnaato afar (4) kulan ama dhageysi dadweyne oo isku xiga, Guddoomiyaha Guddiga uu ka tirsan yahay ayaa siinaya digniin qoraal ah lana ogeysiinayo Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare;
2. Xubintii aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga ama Guddoomiyaha Aqalka Sare oo ka maqnaado lix kulan oo isku xiga ama aan kasoo qeyb galin kulamada Guddiga oo dhan muddo ka badan sadex bilood waxaa xubintaa loo gudbinaya Guddiga Xeer-hoosaadka, maamuuska Anshaxa iyo Xasaanadda si looga qaado tilaabada ku haboon;
3. Haddii kuxigeen ka Guddoomiyaha Guddiga ama xoghayaha Guddiga ayagoon ogolaansho ka haysan Guddoomiyaha Guddiga ama Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ay ka maqanaadaan afar kulan oo isku xiga ama kulamada Guddigu yeesho oo dhan, waqti ka badan labo biloood waxaa si dhaqso leh loogu Gudbinayaa Guddiga Xeer-hoosaadka, Anshaxa Xasaanadda iyo Daryeelka Sanatorada;
4. Haddii Guddoomiyaha Guddiga asagoo aan ka haysan ogolaansho Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare uu ka maqnaado afar kulan oo isku xiga ama kulamada uu yeesho Guddigu waqti ka badan laba bilood waxuu weynayaa Xilkii Guddoomiyenimada.

## QODOBKA 69-AAD: HABKA KULAMADA GUDDIYADA

1. Kulamada Guddiyada waa inuu guddoomiyaa Guddoomiyaha Guddiga.
2. Haddii uu maqanyahay Gudoomiyaha guddigu, ku xigeenka guddoomiyaha ayaa qabanaya shaqadii Guddoomiyaha.
3. Guddoomiyaha waa inuu maamulaa doodaha guddiga, asagoo xaqiiqsanaya/aqoonsanaya qof kasta oo hadlaya, xaqiijinayana in waxyaabaha laga doodayo ay waafaqsan yihiin sharciyo iyo xeerar jira.
4. Guddoomiyuhu waa inuu xaqiiqsadaa qofka uu yahay ka hor inta aaney hadlin xubnaha guddigu.
5. Guddoomiyuhu waa inuu u ogolaado xubnaha in ay u hadlaan sida ay ugu kala horeeyaan codsiga ah in ay hadlaan.
6. Haddii nidaamka kulanka aan la ilaalin, Gudoomiyuhu waxaa uu joojin karaa kulanka.
7. Shirka Guddiga ee kulankaas waxaa guddoominaya Xoghayaha Guddiga haddii ay maqanyihiin Gudoomiyaha guddiga iyo ku xigeenkiisa.
8. Xoghaynta Guddiga ayaa ka mas'uul ah qaadista minityada (qoraallada) kulanka, galeynta/xifidida qoraalada guddiga, helidda iyo ka qaadista qoraalada xafiiska guddiga, fududeynta xiriirka guddiga iyo xukuumadda. Guud ahaana xogyaha ayaa la soconaya hirgalinta go'aamada guddigu gaaro.

## QODOBKA 70-AAD: GUNTANKA SHIRKA GUDDIGU KU ANSIXI KARO.

1. Guntanka shirka Guddigu ku ansixi karo waa 50%+1 Xubnaha guddiga.
2. Waxaa loo baahan yahay in uu guntanku dhan yahay 50%+1 Xubnaha Guddiga marka Guddigu go'aan gaarayo.
3. Kulamadda lagu dajinaayo qorshe-hawleedka Guddiga, kulamada dhageysiga dadweyne, kulammada kormeerka ama dabagalka xukuumadda iyo hawlaha shaqo kale ee Guddiga uma baahna guntan.

## QODOBKA 71-AAD: CODEYNTA

1. Go'aanada Guddiga waxaa la gaaraa ayadoo la raacayo ansixinta Soo jeedin ku yimaada cod aqlabiyad ah oo ay ku codeeyaan inta badan xubnaha jooga oo codeynaya.
2. Haddii uu cod ku nodqo bar-bar dhac halka uu Guddoomiyaha codkiisu raaco ayaa la ansixinayaa.
3. Gabagabada doodda ee arrin laga doodi karo, haddii talo la soo jeediyo, gudoomiyaha ayaa u aqrinaya gudiga qodobkaas la soo jeediyay waxaa uuna weydiinayaa in ay aqbalaan in laga doodo iyo in kale.
4. Haddii uu jiro khilaaf cad oo ku saabsan soo jeedin ka-doodis u baahan la keenay oo u dhexeeya guddiga, Guddoomiyuhu waxaa uu ugu baaqayaa gudiga inay cod u qaadaan arrinkaas.
5. . Xubnaha guddigu waxaa ay u codeynayaan ayagoo taagaya gacanta, tirada codadkaas dhinac kastana waa in lagu qoraa ama sheegaa Hadal qoraalka kulanka guddiga.
6. Xubin ka mid ah guddiga waxa ay codsan kartaa cod bixinta oo qoran/diwaangashan, waa haddii codsigaasu yimaado ka hor intii aan loo guda gelin codeynta.
7. Haddii xubin ka mid ah guddiga ay codsato codeynta la qoro, xoghaynta guddigu waa inuu yeeriyaa ama aqriyaa magacyada xubnaha sida ay ugu kala horeeyaan xaraf ahaan, xubin kasta waxaa uu ku jawaabayaa "haa" ama "maya", natiijada codkana waxaa ku dhawaaqa xoghayaha guddiga, gudoomiyaha guddiga waxaa uu cadeeyaa in soo jeedintaas la ansixiyey ama aqbalay iyo in la diidey, natiijada iyo magacayada xubnaha oggolaaday iyo kuwa diiddayba waxaa lagu sheegaa ama lagu qoraa hadal qoraalka kulanka.
8. Xoghayaha guddiga waa inuu xaqiijiyaa in go'aamada guddigga loo diray Guddoonka Aqalka Sare.

## QODOBKA 72-AAD: DHAGEYSIGA DADWEYNAHA

1. Si loo helo warbixino la xirriira arrinta Guddigu ka doodayo, Guddigu waa inuu qabtaa kulamo furan oo ay dhagaysanayaan khabiiro, wakiilo ka socda ururrada bulshada rayid ka ah, iyo shaqsiyaad kale ee keeni Kara warbixino muhiim ah, haddii uusan Guddigu u arkin in aan loo baahnayn in la qabto dhageysigaas.

2. Marka shaqo loo xilsaaro Guddiga si uu uga doodo, Guddiga arrintaa masuulka ka ahi waa inuu ogolaadaa inuu qabto kulan dadweynuhu dhagaysanayaan haddii afar meelood oo meel (1/4) xubnaha Guddiga ay sidaa dalbadaan.
3. Haddii Guddigu ogolaan waayo dhagaysiga dadweynaha, dadweynuhu wuxuu xaq u leeyahay ra'yigooda in ay qoraal ugu soo gudbiyaan Guddoonka Golaha Aqalka Sare.

## QODOBKA 73-AAD: DIB U EEGISTA IYO KA WARBIXINTA QORAALADA SHARCIYADA QABYADA AH

Marka Sharci qabyo ah Aqalka Sare usoo gudbiyo Guddi, Guddigaasi waa inuu u dib u eegis ku sameeyaa ugana soo warbixiyaa Golaha, muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah.

1. Marka Sharciga qabyo qoraalka ah soo gaaro Guddiga, muddo toban (10) maalmood gudahood ah Guddigu waa inuu uyeeraa cidda soo gudbisay Sharcigaa qabyada ah, si uu ugu sharraxo Sharcigaa Guddiga, uuna uga jawaabo su'aalaha Xubnaha Guddiga ay ka qabaan Sharcigaa qabyada ah. Sidoo kale haddii cidda keentay Sharciga qabyada ah aaney ahayn wasaarad, Guddigu waa inuu uyeeraa cidda Sharcigaa shaqada ku leh ama ha'yadaha ay arrintu khuseyso muddada kor ku xusan;
2. Marka Sharciga qabyo qoraalka ah soo gaaro Guddiga, muddo toban (10) maalmood gudahood ah Guddigu waa inuu u diraa nuqul ka mid ah Sharciga dhammaan Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka kana codsadaa inay mudo labatan (20) maalmood gudahood ah ay ku soo diraan talo soo jeedintooda oo qoraal ah;
3. Marka Sharciga qabyo qoraalka ah soo gaaro Guddiga, muddo sodon (30) maalmood gudahood ah Guddigu waa inuu qabtaa kulamo furan oo ay dhagaysanayaan khabiiro, wakiilo ka socda ururrada bulshada rayid ka ah iyo shaqsiyaad kale ee keeni kara warbixino la xiriira Sharcigaa qabyo qoraalka ah; hadii uu Guddigu u baahdo, wuxuu u yeeran karaa wakiilo ka socda Dowlad Goboleedyada si uu u dhageysto warbixinadooda, iyagoo kaga qeyb qaadan kara soo xaadirida goobta kulanka/dhageysiga, aalada maqalka iyo muuqaalka ah,markii Guddigu ku qanci waayo soo jeedintii qoraalka ay soo gudbiyeen Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

4. Kadib marka uu dhagaysto xogta saraakiisha Dawaladda iyo goobjoogeyaasha kale, Guddigu waa inuu u dib-u-eegis ku sameyaa Sharcigaas qabyada ah qodob qodob.
5. Ka dib marka Guddigu gabagabeeyo shaqada ku xusan faqradaha kore (1-5), waxaa Guddigu warbixintaas oo qoran u gudbinayaa Aqalka Sare ayadoo ay la socoto wixii la badalay ama ayna la socon. Warbixintaas waxaa soo jeediya hadal ahaan Aqalka Sare dhexdiisa guddoomiyaha Guddiga ama Xubin kamid ah Guddiga oo uu asagu u xilsaarto arrintaas.
6. Warbixinta ku saabsan Sharciga qabyada ah waa in lagu soo bandhigo isbadallo cayiman oo sabab loo yeelayo kuwaasoo Aqalka Sare uu go'aan uga gaaro kulankiisa xilliga warbixinta.
7. Guddigu waxa uu xaq u leeyahay inuu u soo jeediyo Aqalka Sare diidmada Sharci qabyo ah asagoo soo bandhigaya cadaymo la xiriira sababta uu u diidayo Sharcigaas;
8. Sharci qabyo qoraal ah ee aan wax tilaabo ah laga samayn muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah kadib marka uu soo gaaro Guddiga, waxaa si dhaqsa ah loogu soo celinayaa Fadhiga Guud ee Golaha si uu uga qaato tilaabada xigta.

## QODOBKA 74-AAD: XOG RAADINTA GUDDIGA

Iyadoo Sharciga la raacayo wuxuu Guddiga weydiisan karaa Xukuumadda, Hay'adaha ama dhinac kale, in ay siiyaan guddiga tafaasiil ama warbixin ama qoraal guddigu uu ugu baahan yahay inuu ku guto shaqadiisa.

## QODOBKA 75-AAD: BAARITAANNADA UU SAMEEYO GUDDIGU

Si loo helo xog dheeraad ah waqtiga guddigu baarista ku wado Xukuumadda, Guddigu waxaa uu qaban qaabin karaa kulan ay dhagaysanayaan dadweynaha (kulan furan),waxaa uuna ku marti galin karaa khubaro iyo shakhsiyaad kale oo keeni kara xog wax ku ool ah. Ku dhawaaqista kulanka dhageeysiga dadweynaha ah iyo arrimaha ay tahay in warbixintooda la kulmiyo waxaa lagu baahin karaa warbaahinta, guddigu waxaa uu ka codsan karaa shaqsiyaadka lagu marti galiyey kulanka furan in ay ku keenaan fikradahooda hab qoraal ah.

## QODOBKA 76-AAD: WARBIXINTA GUDDIGA EE ARRIMAHA LA BAARAY

1. Dhammaan warbixinnada waa in ay ku cad yihiin awoodda Sharci ee lagu samaynayo baarista.
2. Dhammaan warbixinnada waa inay ku cad yihiin magacyada xubnaha Guddiga ee ka qeybqaatay warbixintaas.
3. Warbixintu waa in ay cadayso arrinka ama arrimaha laga shaqeeyey iyo xogaha uu gudigu helay, waxaa sidoo kale warbixintu leedahay tixraaca qeybaha ku haboon ee waxyaabaha la soo gudbiyey ee guddigu ku helay hab qoraal ah iyo hab hadal ahba.
4. Qoraalka warbixinta waa in lagu daraa talo soo jeedinta guddiga ee arrinta la daraaseeyay oo taxan.
5. Warbixintu waa in ay leedahay lifaaq ay ku taxan/qoran yihiin goobjoogayaasha la dhagaystay iyo warbixinnada la soo gudbiyey intii ay daraasaddu socotay, marka uu codsado xubin ka mid ah Aqalka Sare.
6. Dhammaan Dukumentiyada la xiriira warbixinta Guddiga waa in la keydiyaa uuna heli karaa Senator kasta oo soo codsada.
7. Haddii guddigu rabo inuu ka codsado Xukuumadda in ay jawaab ka bixiso warbixnta, gaar ahaan tan la xirrirta talo soo jeedinta guddiga, codsigaa qoraalkiisa waa in lagu qoraa warbixinta ka hor saxiixa gudoomiyaha.
8. Xukuumaddu waa in jawaab celin qoraal ah u gudbisaa Guddiyada muddo aan ka badneen Soddon (30) malmood ka dib markii warbixinta la gudoomay.
9. Sida uu qabo qodobka 77-aad ee Dastuurku, Aqalka Sare wuxuu u yeeri karaa Ra'iisul Wasaaraha, Xubnaha Golaha Wasiirada iyo Gudoomiyayaasha Guddiyada Madax-Banaan iyo Xafiisyada kale.

## QODOBKA 77-AAD: GUDDI HOOSAADYADA

1. Guddigu waa inuu sameystaa Guddi hoosaadyo, si ay hawshu ugu fududaato;
2. Guddi hoosaadyada uma baahna guntan marka ay gudanayaan shaqada loo igmaday, maadama ay u soo gudbinayaan warbixinadooda Guddiga loo dhan yahay.

3. Guddi-hoosaadku waa inuu helo awood buuxda ayadoo la eegayo waajibaadka uu faray Guddigu.
4. Xubnaha Guddi-hoosaadku waa Xubno ka mida Guddiga caadiga ah.
5. Iyadoo la tixraacayo hawl khaas ah ee Guddi-hoosaadku leeyahay, Guddigu waxaa uu u caddayn karaa taariikhda ay tahay in Guddi- hoosaadku uu kusoo celiyo warbixintiisa.
6. Marka Guddi-hoosaad loo xilsaaro inuu arrin cayiman daraaseeyo, Guddi-hoosaadkaan jiritaankiisu waxaa uu ku egyahay kadib, marka uu Guddiga u keeno warbixinttisa ugu danbeysa.
7. Marka Guddigu ka helo Guddi-hoosaadka warbxinta ugu danmbeysa, Guddigu waa inuu darsaa, ansixiyaana warbxiintaa kama-danbeysta ah, isla mar ahaantaana waa in Guddomiyaha Guddigu warbixinta kama-danbeysta ah u gudbiyaa Aqalka Sare. Guddi-hoosaadyadu awood uma laha in ay toos ugu gudbiyaan Aqalka Sare warbixintooda.
8. Guddi-hoosaadku Kama garab furi karo kulan ayadoo uu socdo kulankii Guddiga.

## QODOBKA 78-AAD: QORSHEYAASHA SHAQO IYO QOONDEYNTA MIISAANIYADDA GUDDIGA

1. Guddoomiyuhu asagoo la tashanaya xubnaha kale ee guddiga waa inuu diyaariyo bilowga sanad kasta ugu danbeyn bisha sadexaad kowdeeda qorshaha shaqo ee Guddiga, iyo howlaha guddiga, tasoo ay ka mid noqon karto abuurista guddi hoosaadyada, qorshahaa shaqada waa inuu ansixiyaa guddigu.

2. Guddigu waa inuu qiimeeyaa qorshahiisa shaqo seddexdii biloodba mar, haddii ay muhiim noqotana wax bey ka badali karaan qorshahooda.

3. Gudigu waa inuu diyaariyaa, ansixiyaana sanad qorshe lagula soconayo si loo maareeyo in xukuumadda Soomaaliya ama wasaaradda arrinta shaqada ku leh ay hirgaliso sharciyada, oo ay ku jiraan la socoshada dhamaan howlaha wasaaraddaha arrintaa shaqada ku leh, taasoo qeyb ka ah qorshaha shaqo ee guddiga.

4. Guddiyada waa in ay helaan adeegyada khubarada, xirfadlayaasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyeyaasha xafiisyada, hadba sidii uu guddigu u arko in ay tahay muhiim, hadba inta ay awood u siinayso Miisaaniyadda uu u ansixiyey Golaha Aqalka sare.

5. Guddiyada waa in awood loo siiyo in ay u safraan meel ka baxsan xarunta Aqalka Sare, si ay u soo dhagaystaan caddaymo, u sameeyaan la tashiyo ama ay booqdaan goobo la xiriira baaristooda.

6. Xoghaynta guddiga, waxaa uu u xilsaaran yahay diyaarinta dhamaan safarrada guddiga sida uu ugu sheego gudoomiyaha guddigu asagoo matalaya guddiga.

7. Gudoomiyaha Guddi kasta, asagoo la tashanaya xubnaha kale ee guddiga, waa inuu diyaariyaa Miisaaniyadda sanadka soo socda oo ku saleysan qorshahooda shaqo,waana inuu u soo gudbiyaa xafiiska Guddiga Joogtada Aqalka Sare si loo ansixiyo. Guddigu waa inuu ansixiyo miisaaniyadiisa ugu danbeyn bisha sedexaad kowdeeda.

8. Miisaniyadda waa in ay ku jiraan, aaneyse ku xadidnaan:-

b) Kharashka helida adeegyada khubarada, xirfadlayaasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyayaasha xafiisyada, hadba sida loo arko in ay muhiim u yihiin.

t) Kharashka safarrada xubnaha guddiga ama xubanaha shaqaalaha ee la xiriira shaqada guddigan sida sharcigu u oggolyahay, kharashyadaa waxaa kamid ah ,kan raacista gaadidka,cuntada, gunno maalmeedka, hoyga xubnaha, kirada qolalka shirarka, adeegayada tarjumaadda, iyo kharashaadka kale sida saadka, dirista dhambaallada iyo waraaqaha, iibsashada qoraallada iyo qalabka kombuyuutarrada(IT), iyo adeega cabitaanka/qaboojiyeyaasha.

9. Kharashaadka guddigu waa in aysan ka hor imaan xadeynta cayiman ama sharciyada.

10. Codsiga ogolaanshaha safarka waa in hab qoraal ah loogu soo gudbiyaa Xafiiska isagoo caddeynaya:-

b) Ujeedada safarka

t) Taariikhda la safrayo

j) meelaha loo safrayo

x) Magacyada xubnaha la doonayo in loo ogolaado safarka.
Kh) Qiimaha uu ku kacayo safarku.

11. Guddigu waa inuu diyaariyaa, Aqalka Sare-na u gudbiyaa warbixin qoran oo ku saabsan safar kasta oo guddigu galo ee ku xusan qodobkan. Warbixintu waa in ay ku jirto faahfaahinta safarka, kharashaadka, howlaha, warbixinada la helay iyo go aanada lagu gaaray safarka.

12. Tixgalinta sharciyada qabyada ah waa in ay lahaadaan mudnaanta koowaad ee guddiyada oo dhan, waana in ay ka hormaraan daraasadaha iyo baaritaanada kale oo dhan.

## QODOBKA 79-AAD: SHAQAALAHA GUDDIYADA

1. Aqalka Sare waa inuu siiyaa guddiyada shaqaale maamul iyo mid farsamoba.
2. Marka guddiga la siiyo shaqaale taageera, Guddoomiyaha Guddiga ayaa kormeeraya shaqaalalaha maamulka ee Guddiga.

## QODOBKA 80-AAD: QORAALLADA GUDDIGA

1. Xeerarka khuseeya qoraallada Aqalka Sare, marka lagu sameeyo is-beddello aga maarmi waayo, waxay saameyn ku yeelanayaan qoraalada Guddiyada.

2. Hadal qoraalka shirarka Guddiyada waa in loo qoraa hab la mida kuwa Aqalka Sare. Waxaa u sii dheer arrimaha hoos ku xusan:

b) Haddii shirka uu ahaa mid furan ama mid xiran

t) Magacyada shaqaalaha goob-joog ka ahaa

j) Magacyada Goob joogayaasha, masu'uliyadooda iyo hay'adaha ay ka kala socdaan, haddii ay jiraan.

3. Hadal qoraalka waa in ay ku saxeexan yihiin Xoghayaha iyo Guddoomiyaha guddiga
4. Warbixinnada Guddiga ee loo gudbinayo Aqalka Sare waxay noqonayaan kuwa kooban oo hal bog ah, waana ay ka badanaan karaan, markasta waa inay daabacayihiin mid walbo iskuna dheganyihiin.
5. Hadal qoraalka shirarka Guddiyada oo maqal iyo muqaal ah waa la sameyn karaa haddii sidaas Guddigu go'aansado.

## QODOBKA 81-AAD:GUDDIYADA AQALKA SARE
## Guddiga Joogatada ee Golaha

Xubnaha Guddigaan waxay ka kooban yihiin:

- Guddomiyaha Golaha iyo labadiisa ku-xigeen
- Hab dhowraha iyo ku-xigeenkiisa
- Guddomiyayaasha Guddiyada Golaha.

1. Sida ku xusan Qodabka 13aad ee Xeer-hoosaadka, Guddiga Joogtada ayaa mas'uul ka ah diyaarinta Hawlaha Golaha iyo sida ay u kala horeynayaan, balsa Guddomiyaha ayaa badali kara xilliga doodda.
2. Guddigu isagoo la tashanaya Guddomiyaha waxa uu soojeedin karaa waqtiga loo qoondeeyay dooda heerarka Hindise Sharciyeedka iyo hawlaha kale.
3. Guddigu waxa kale uu qabanayaa howlaha uu u fasaxo Xeer-hoosaadka ama Goluhu u igmado.
4. Fadhiyada Guddigu waxaa ay noqonayaan kuwa xiran, waxayna kulmayaan marka uu dalbado Guddoomiyuhu, Sadax meelod meel Xubnaha Guddigu ama Goluhu amro.
5. Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah usoo gudbiyaan Aqalka.

## Guddiga Xeer-hoosaadka, Anshaxa , Xasaanadda Iyo Daryeelka Sanatarada

Guddi hoosaadyada Guudiga:

b) Guddiga Xeer-hoosaadka.

t) Guddiga Anshaxa.

j) Guddiga Xasaanada iyo Daryeelka Sanatarada.

Arrimaha hoos imaanaya Guddigan waxaa ka mid ah:

b) Inay uyeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo
t) Guddigan waa In uu yeeshaa la-taliyeyaal Sharci

j) Lixdan (60) cisho gudahood xilliga la dhiso Guddigaan ka dib ee lagu jiro kal-fadhiga kowaad, waqti waa in loo qoondeeyo tixgalinta Xeer-hoosaadka sida uu Guddigan soo jeediyo.

x) Soddon (30) cisho gudahood ee bilawga Kal-fadhi kasta ee Golaha Aqalka Sare, Guddigan wuxuu ka dooddayaa Hindisaha wax ka bedel ee Xeerka wuxuuna u gudbinayaa talo soo jeedintiisa Aqalka Sare si loo ansaxiyo.

Kh) Guddigan wuxuu tixgalinayaa arrimaha la xariira Xasaanadda xubnaha wixii talo soo jeedin ahna u gudbiyaa Golaha.

d) Guddigan wuxuu talo bixin ka jeediyaa arrimaha la xariira luminta xubinnimada ee Aqalka Sare sida ku cad qodobka 59aad ee Dastuurka ku meel gaarka.
r) Guddigan wuxuu talo bixin ka jeediyaa arrimaha la xariira tallabooyinka anshax marin ee laga qaadayo xubin ka tirsan Aqalka Sare sababo ay kamid yihiin anshax xumo ama ku xadgudubka Xeer-hoosaadka Golaha.

s) Guddigan wuxuu soo jeediyaa tallaabooyinka maamul ee lagu xoojinayo hab-dhaqanka iyo anshaxa xubnaha.

Sh) Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah usoo gudbiyaan Golaha Aqalka Sare
Dh) Xirriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah.

## Guddiga La Socodka Dib-u-eegista, Dhaqangelinta Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka.

Guddigani waxay shaqo joogto ah wada yeelanayaan Guddiga kale ee Dastuurka Golaha Shacabka Iyadoo la tixgalinayo sida ku cad qodobka 133 ee Dastuurka kumeelgaarka ah, Guddiga La Socodku wuxuu:

b) u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
t) Kormeerayaa, farayaa, ansaxinayaana hawlaha Guddiga dib-u-eegista iyo dhaqangalinta Dastuurka iyo guud ahaanba ku dhaqanka Dastuurka.
j) Xilliyada qaarkood fari karaa Guddiga Dib-u-eegista iyo Dhaqangalinta Dastuurka mashruuc qoraal Sharci iyadoo lagu saleynayo baahida Dastuurka ku meel gaarka ah ee dalka.
x) Dib-u-eegayaa qabyo qoraalada wax ka bedelka Dastuurka ama Hindise Sharciyeedyada iyo warbixinadda ku lifaaqan ee ka timid Guddiga Dib-u-eegista iyo Dhaqan galinta Dastuurka.
Kh) Ogeysiiyaa dadweynaha wixii soo jeedin ah.
d) Intii suurtogal ah, sugayaa in ay jiraan fursado ku filan ka qeyb-galka doodda daweynaha.
r) La tashanayaa xubnaha ka socda dadweynaha.
s) Hubinyaa in xubnaha ka socda dadweynaha ay haystaan fursado ku filan oo ay kusoo bandhigi karaan fikirkooda iyo aaraadooda Guddiga isku-dhafka ah.
Sh) La hadlayaa Baarlamaanka Maamul Goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka isla markaana ku biiriyo fikirka qoraallada ka yimaada xubnaha Maamul Goboleedyada Federaalka ka midka ah talo soo jeedinta wax ka beddel haddii ay arrinta khuseyso danaha Maamul Goboleedka xubinta ka ah Federaalka.
Dh) Kormeerayaa dhaqan gelinta mabaadii'da Federaalka Soomaaliya.
c) Warbixin siinayaa Golaha ugu yaraan hal jeer sedexdii biloodba.
g) Qabanayaa wixii hawl kale ah ee Dastuurka ku meel gaarka ah iyo Sharciga Federaalka ah farayo.
f) Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka.
q) Xiriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah.

## Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqul Insaanka,

Guddi hoosaadyada Guddiga:

b) Guddiga Garsoorka.

t) Guddiga Arrimaha Diinta iyo Awqaafta.

j) Guddiga Xuquuqul Insaanka.

x) Guddiga Haweenka iyo Caruurta.

**Waajibaadka Guddiga waxaa kamid ah:**

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo
2. Hubinta madaxbannanida Garsoorka,
3. Ka baaraandegista Shuruucda la xiriirta hayadaha Garsoorka & Garsoorayaasha
4. La socodka cabashooyinka bulshada ee la xiriira Arrimaha Garsoorka iyo Gardoonka.
5. La socodka Howlaha Shaqo ee Guddiga Adeegga Garsoorka.
6. La socdka Arrimaha Xabsiyada iyo Maamulkooda.
7. Xafiiska Gardoonka sida ku xusan Dastuurka ku meel gaarka ah iyo Xeerka Federaalka.
8. Xaqiiqa raadinta ku saabsan xadgudbyada ka dhanka ah Xuquuqda Bani'aadamka.
9. Ka tala bixinta Arrimaha Caddaalada xilliga kala guurka ah. (Transitional Justice) iyo tacaddiyaada la geystay iska raaligelintooda.
10. Xuquuqul Insaanka.
11. Dadka naafada/curyaanka ah.
12. Ilaalinta xuquuqda dhalaanka.
13. Ilaalinta xuquuqda dadka waayeelka ah.
14. Arrimaha jinsiga (lab/dheddig).
15. Dadka gudaha ku barakacay.
16. Ka talabixinta iyo u kuur-gelidda arrimaha la xariira Barashada & faafinta diinta Islaamka.
17. Ka tala-bixinta hawlaha la xiriira Maamulka Masaajidda, Xajka & Cimarada iyo hawlaha kheyriga ah.
18. Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Golaha Aqalka Sare
19. Xiriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib- u heshiisiinta iyo xirriirka Dowlad Goboleedyada.

Guddi Hoosaadkayada Guddiga:

1. Guddiga Arrimaha Guddaha.
2. Guddiga Xiriirka Dowlad Goboleedyada.
3. Guddiga Dib-u heshiisiinta.

## Waajibaadka Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Dowlad Goboleedyada Waxaa ka mid ah:

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
2. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta Shuruucda la xiriirta hawshooda.
3. Katala bixinta iyo la socodka Arrimaha Maamul Goboleedyada si waafaqsan Dastuurka.
4. Katala bixinta xiriir wanaaga hoggaanka dhaqameedyada iyo Maamuladda Gobolada iyo degmooyinka.
5. Wuxuu la soconayaa kor joogteynayaana habsami usocodka hawlaha Guddiga xaqiiqo raadinta iyo Dib-u-heshiisiinta ee ku xusan Dastuurka.
6. Wuxuu la soconayaa kor joogteynayaana habsami usocodka hawlaha Guddiga Qaranka Xuduudaha iyo Federaalka.
7. Wuxuu la soconayaa kor joogteynayaana habsami usocodka hawlaha Guddiga Doorashooyinka Qaranka.
8. Wuxuu daraasad ku soo sameynayaa talana ka soo bixinayaa dhulka iyo hantida qaranka la haysto iyo midda gaar ahaaneed ee Sharci darrada lagu kala haysto.
9. Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka Sare
10. Xiriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah.

## Guddiga Difaaca iyo amniga

Guddi hoosaadyada Guddiga

1. Guddiga Difaaca
2. Guddiga Amniga

## Waajibaadka Guddiga amniga iyo difaaca waxaa ka mid ah:

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
2. Hub ka dhigista dadweynaha.
3. Dhaqan celinta maleeshiyooyinka.
4. Illaalinta Xuduuda Dalka.
5. La socodka la dagaalanka tahriibka, maandooriyayaasha, burcadda barriga iyo tan badda.
6. La socodka la dagaalanka kooxaha argagixisada.
7. Guddigan wuxuu korjoogtaynayaa Guddiga Amniga Qaranka.
8. La socodka Arrimaha socdaalka iyo jinsiyidda.
9. La socodka Arrimaha Ciidanka xooga dalka, Boliiska, nabad sugidda iyo asluubta.
10. La socodka Qorshaha Qaran ee amniga iyo xasilinta dalka.
11. Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka Sare.
12. Xiriir kasta oo guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, maal-gashiga iyo iskaashiga Caalamiga.

Gudi Hoosaadyada Guddiga

a)Arrimaha Dibada.

b) guddiga qorsheynta.

c) Guddiga maalgashiga.

d)Gudiga Iskaashiga Caalamiga.

**waajibaadka Guddigan waxaa ka mid ah:**

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo
2. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta Shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
3. Xirriirka Caalamiga ah.
4. Heshiisyada iyo Axdiyada Caalamiga ah.
5. Arrimha Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha JFS.
6. Qurbo joogta.
7. Qaxootiga Dibadda ku nool.
8. La socodka Xiriika iskaashiga dhaqan dhaqaale ee aan la leenahay dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah.
9. La socodka barnaamijyada Hormarineed ee dalka.
10. U kuurgelidda deeqaha la siiyo dalka iyo in si cadaalad ah loogu qeybiyo dowlad Goboleedyada dalka.
11. Hubinta iyo iswaafajinta qorshaha Qaranka & barnaamijyada hormarineed ee dalka.
12. Hubinta iyo dabagalka in si sax ah loo fuliyay Mashaariicda hormarineed ee dalka loo dajiyay.
13. Dhaqngelinta soo jiidashada maalgeshadeyaasha Gudaha iyo dibedda iyadoo loo sameynayo Shuruuc gaar ah oo fududeynaya maalgeshiga dalka.
14. Inay labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka Sare.
15. Xirriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada, arrimaha bani'aadanimada, Warfaafinta iyo dhaqanka.

Guddi hoosaadyada Guddiga

- ✓ Guddiga Caafimaadka.
- ✓ Guddiga Waxbarashada.
- ✓ Guddiga Shaqaalaha.
- ✓ Guddiga Dhallinyarada iyo Isboortiga.
- ✓ Guddiga Arimaha Bani'aadannimada.
- ✓ Guddiga Warfaafinta.
- ✓ Guddiga Dhaqanka.

**Waajibaadka Guddigan waxaa ka mid ah:**

1. Inay uyeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
2. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
3. . Caafimaadka bulshada.
4. Siyaasadda caafimaad Qaran.
5. Daryeeelka Caafimaadka iyo caymiska.
6. Waxbarashada hoose iyo tan sare.
7. Gargaarka bani'aadanimo ay ka mid yihiin sida loo maareynayo abaaraha iyo masiibooyinka kale.
8. Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada aan rasmiga aheyn.
9. Saynsiga & Arrimaha Tiknoolajiyada.
10. Hormarinta dhaqanka.
11. Arrimaha shaqada.
12. Ururada Bulshada.
13. Arrimaha Dhallinyarada.
14. Arrimaha Isboortiga.
15. Warfaafinta iyo wacyigelinta.
16. . Siyaasada warbaahinta.
17. Warbaahinta Qaranka (SNTV, Radio Mogadishu iyo SONNA).
18. Xuquuqda daabacaadda iyo xuquuqda lahaansho fikir.
19. In labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo Gudbiyaan Aqalka Sare.
20. Xirriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## Guddiga Kheyraadka Qaranka, kaabayaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka.

## Guddi Hoosaadyada Guddiga

- Guddiga Macdanta Biyaha iyo Shidaalka.
- Guddiga Beeraha iyo Siyaasada Dhulka.
- Guddiga Kheyraadka Badda.
- Guddiga Xanaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.
- Guddiga Ilaalinta Deegaanka iyo Bii'ada.
- Guddiga Kaabayaasha Dhaqaalaha iyo Gaadiidka.

**Waajibaadka Guddigan waxaa ka mid ah:**

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
2. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta Shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
3. Dalagga beeraha.
4. Dib–u-noolaynta Dhulka.
5. Waraabka.

6. Kalluumaysiga.
7. Ilaalinta noolaha Badda.
8. Ka hortagga kalluumaysiga Sharci darrada ah.
9. Dib-u-eegida Shurruucda la xiriira kalluumaysiga.
10. Xoolaha Nool.
11. Dejinta Shurruucda la xiriirta horumarinta, xannaanada iyo kobcinta xoolaha.
12. Farsameynta iyo tayaynta wax soo saarka xoolaha nool.
13. Soo saarista, Horumarinta iyo dayactirka calafka xoolaha Nool.
14. Horumarinta ganacsiga xoolaha.
15. Horumarinta baarista aqoonta la xiriirta xoolaha.
16. Horumarinta caafimaadka xoolaha.
17. Ilaalinta bii'adda, badda, berriga iyo hawada sare.
18. Ilaailnta Duurjoogta.
19. Dejinta Shuruuc la xiriirta ka faa'ideysiga khayraadka dabiiciga ah.
20. Dib-u eegista iyo la socodka Shuruucda la xiriirta kheyraadka sida: Shidaalka, Macdanta iyo Biyaha.
21. Dhismaha iyo ilaalinta waddooyinka,
22. Dhismayasha Dowladda.
23. Dhismaha Gegida Diyaaradaha iyo Dekedaha.
24. Gaadiidka noocyadiisa kala duwan.
25. Tamarta ( Korontada,Qorraxda, Biyaha, Shidaalka, dabeysha Iwm).
26. In labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka Sare.
27. Xirriir kasta oo guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## GUDDIGA DHAQAALAHA, MALIYADDA ,GANACSIGA,WARSHADAHA, ISGAARSIINTA IYO DALXIISKA

**Guddi hoosaadyada Guddiga:**

- Guddiga Dhaqaalaha.
- Guddiga Maaliyadda.
- Gudidga Ganacsiga.
- Guddiga Warshadaha.
- Guddiga isgaarsiinta.
- Guddiga Dalxiiska.

**Waajibaadka Guddigan waxaa kamid ah:**

1. Inay u yeeri karaan cid kasta oo xiriir la leh waajibaadkooda shaqo.
2. Ka tala bixinta iyo u kuurgelidda siyaasada Gancsiga Dalka.
3. Ka tala bixinta iyo u kuurgelidda Siyaasadda Horumarinta Warshadaha.
4. U kuurgalka Shuruucda ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee ganacsiga (Patent rights).
5. U kuurgalka shuruucda ilaalinta tayada ganacsiga la soo waarido iyo nooca wax soo saarka Warshadaha (quality control laws).

6. Ka tala bixinta siyaasada Warshadaha.

7. Ka tala bixinta siyaasada Isgaarsiinta.

8. Ka tala bixinta siyaasada Dalxiiska.

9. In labadii biloodba warbixin qoraal ah u soo gudbiyaan Aqalka Sare.

10. Xirriir kasta oo Guddigu la sameynayo jiha kasta oo shaqo kala dhaxayso waa inuu ahaadaa mid qoraal ah .

## CUTUBKA 9-AAD: KORMEERIDDA XUKUUMADA

## QODOBKA 82-AAD: U YEERIDDA RA'ISUL WASAARAHA IYO GOLAHA WASIIRRADA.

1. Goluhu wuxuu u yeeri karaa Ra'iisul Wasaaraha iyo xubnaha Golaha Wasiirrada si ay wax uga weydiiyaan Arrimaha la xeriira xilkooda sida ku cad qodobka 77aad (2) ee Dastuurka.

2. Masuulkii loo yeera oo ku iman waaya yeeridaas goluhu wuxuu dib u eegis ku sameynayaa xilka uu Qaranka u hayo.

## QODOBKA 83-AAD: SU'AALO XUKUUMADDA LAGU WAYDIINAAYO JAWAAB ORAAH AH & QORAAl.

Sida ku cad qodobka 77aad faqradiisa 1aad ee Dastuurka, Ra'iisulwasaaraha iyo Golaha Wasiirrada waxay Golaha u imaanayaan si ay uga jawaabaan Su'aalo. Xeerka soo socda ayaana la raacayaa:

1. . Inta Golaha Kalfadhigiisu socdo, Ajendaha Axad kasta waa in ay ku jirtaa waqtiga su'aalaha Xukuumadda la weydiinayo, oo aan ka badnaaneyn lixdan (60) daqiiqo.
2. Qaabka su'aalaha waa inay noqdaan kuwa asluubaysan oo masuuliyad leh laguna ixtiraamaa Shuruudaha luqada anshaxa leh.
3. Xubinta su'aasha weydinayso ayaa isla su'aashaas akhrinaysa waqtiga suaalaha.
4. Su'aal jeedintu waa in aysan ka badan mudo hal (1) daqiiqo ah.
5. Jawaabta su'aashu wa in aysan ka badnaan sadex (3) daqiiqo.
6. Senatoradu Su'aal dheeraad ah oo khuseysa ujeedadaas waa ay weydiin karaan wasiirka Xukuumada ka socota, waana ineysan qaadan muddo ka aan badneyn seddax (3) daqiiqo.
7. Jawaab dheeri ah ayaa laga sameyn karaa hadal ahaan, waana inaysan ka badneyn mudo labo (2) daqiiqo.
8. Ra'iisul Wasaaraha waa loo soo jeedin karaa su'aal, Isaguna wuxu u gudbin karaa su'aal kasta mid ka mid Wasiiradiisa hadduu isagu goa'ansado.

9. Su'aalaha jawaabtooda la keeni waayo ama lagu qanci waayo ama waqtiga su'aal jawaabistiisu ka dhacday waa la keydinayaa si mar kale loo weydiiyo cidii ay khusayso.

## QODOBKA 84-AAD: SU'AASHA XUKUUMADDA LOOGA CODSANAYO JAWAAB QORAAL AH

1. Xubnaha Golaha Aqalka sare waxaa ay su'aal codsi qoraal ah u gudbin karaan Ra'iisul Wasaaraha ama Wasiir ka mid ah Xukuumada. Jawaabta waa in lagu so Gudbiyaa muddo aanan ka badneyn labo (2) isbuuc, ka dib maalinta su'aashaasi la soo gudbiyey, waxaana lagu xusayaa qoraalada Shirarka Golaha maalinta laga jawaabayo, ama maalinta xigta ee uu Goluhu fadhigiisa buuxo yeelanayo.

2. Liiska su'aalaha aan laga jawaabin mudadii loogu talo galay waa la kaydinayaa waxaana lagu daabacayaa madbacada Golaha loona qeybinayaa xubnha Golaha mar kale.

3. Haddii uu Guddomiyu u arko in Su'aali ay ka hor imaneyso Xeer-hoosadka,Guddomiyuhu waxaa uu soo jeedin karaa in su'aasha si kale loo dhigo ama lagu celiyo Xubintii weydiisay su'aasha.

4. Shuuradaha Su'aalaha la ogolyahay soo jeedintooda (Su'aaluhu waa in ay waafaqan Shurudaha soo socda):

- Su'aalaha Waa in ay ku xusnaadaan magacyada Shaqsiyaadka ama cadeymaha haddii ay laga maarmaan u noqodaan in ay su'aalaha ka dhigaan mid maangal ah, iyo in haddii cadeeymaha ay xaqiijin karaan Xubnaha ay khuseeyso.
- Su'aashu waa in aysan ku jirin wax muran dhalin kara ama anshaxa ka baxsan ama mala awaal ah.
- Waa in aanan la weydiin Su'aal ku saabsan arrin horay go'aan uga gaaray Goluhu Kalfadhigan.
- Waa inaan la weydiin Su'aal khuseysa arrin Guddi gacanta ku haayo.
- Su'aashu waa in aysan dalban, muujin fikrad ama aysan xal ka raadin arrin Sharci oo aanan jirin ama mala awaal ah.
- Waa in aan la weydiin qof su'aal ka baxsan waajibaadkiisa.
- Su'aal kuma wajahnaan karto in ka badan hal arrin.
- Su'aal oo ay jawaabteedu ku daabacantahay daabacaada rasmiga ah lama weydin karo.
- Su'aal waa in aan laga weydiin qofka dabeecadiisa iyo dhaqankiisa, qofkaas oo dhaqankiisa lagu su'aali karo kaliya soo jeedin nuxur.
- Su'aal looma qori karo si ay u carqaladeyso arrin maxkamadi wali xakumin.

## QODOBKA 85-AAD: JOOGTAYNTA KORMEERKA AY SAMEYNAYAAN GUDDIYADA GOLAHA.

1. Si loo xaqiijiyo dhaqangalinta Shuruucda qaranka, Guddiyada Goluhu waxaa ay la xisaabtamayaan, ayna kormeerayaan howlaha waaxyada dowladda iyo hey'adaha kale ee hoos yimaada xilkooda, si waafaqsan qodobka 62aad ee Xeer-hoosaadka Golaha.
2. Haddii Wasaarad, ama hey'ad kale ee hoos timaadda shaqada Guddi Golaha aysan warbixin keenin ama warbixinteedu aysan dhameystirneyn, marka uu Guddigu codsiga sameeyey ka dib, waxaa arrintaasi lagu dari karaa ajendaha Golaha.
3. Guddiyada waxaa ay uga soo warbixinayaan Golaha dhaqan galka Shuruucda ay shaqada ku leeyihiin warbixintooduna waxaa ay noqoneysaa qoraal iyo hadal jeedin labadii biloodba hal mar.

## CUTUBKA 10-AAD: QODOBO ISKUJIR AH (MISCELLANEOUS)

## QODOBKA 86-AAD: GUDDIYADDA MADAXBANNAAN

Si waafaqsan Qodabka 7aad faqrada (i) iyo 112 ee Dastuurka hab raaca soo socda ayaa noqonaya qaabka ansixinta xubnaha Golaha adeega Garsoorka, Guddomiyaha iyo Garsoorayaasha Maxkamada Dastuuriga ah, Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka, Xubanha Guddiga Xuduudaha iyo Fedaraaleynta iyo Xubnaha Guddiga Xalinta Khilaafaadka.

1. Magacyada Xubnaha loo soo xulay magacaabista waa in loo soo gudbiyaa Guddomiyaha Aqalka Sare qoraal ahaan.
2. Guddomiyuhu waa in uu u gudbiyaa Xubnaha Barlamaanka Fedaraalka magacyada Shaqsiyaadka loo soo gudbiyay in la ansixiyo iyo waqtiga Fadhiga wadaaga Labada Gole ee arrintan eegaya.
3. Xeerka fadhiga wadaag ayaa ku dabaqmaya fadhigaas.
4. Go'aan waliba oo ka soo baxa fadhi wadaaga waa in u ahaadaa cod.
5. Musharaxa waxaa uu ku ansaxayaa haddii ay u codeeyaan aqlabiyada cod hal dheeri ah (50%+1) xubnaha fadhiya ee codeeyay.
6. Barlamaanku wuxuu u yeeri karaa qof magaciisa loo soo gudbiyay si loo ansixiyo.
7. Qofka loo soo gudbiyey Barlamaanka si loo ansixiyo waa in la siiyaa fursad uu uga jawaabo cadeeymo lid ku ah.
8. Ansixinta Barlamaanka lagama hor imaan karo haddii aysan Guddigu helin cadeymo muujinaya in shaqsigu uusan buuxinin sharuudaha ku qoran Sharciga.
9. Ka dib marka Barlamaanka loo soo gudbiyo magacaabis waa in uu go'aan uga gaaro Shan iyo Toban maalin gudahood oo ka bilabanaysa marka ay soo gaarto magacaabista.
10. Haddii inta uu Goluhu ka doodayo magacaabis ay go'aan ka gaari waayaan sababo la xiriira xog la'aan ama asbaab kale, Guddomiyaha Fadhi wadaaga waa in uu ku wargaliyaa Madaxweynaha Sadax maalin shaqo gudaheed in Goluhu go'aan ka gaari waayey iyo asbaabaha.
11. Haddii Goluhu go'aan gaaro Guddomiyaha Aqalka Sare waa in uu ku wargaliyaa Madaxweynaha go'aanka laga gaaray.

## QODOBKA 87-AAD: CODSI WADAREED QORAAL AH (PETITION)

1. Codsi Wadareedka waa inuu keydiyo Xoghayaha Guud.
2. Codsi Wadareed waliba waa inuu soo jeediyaa Sanatar.
3. Marka Codsi Wadareed loo soo jeedinaayo Golaha, Sanatarku waa in uusan ka bixin mowduuca soo jeedinta.
4. Dhammaan Codsi Wadareedyada marka loo soo gudbiyo Golaha, Guddoomiyuhu wuxuu u xilsaari karaa Guddi.
5. Guddoomiyuhu wuxuu Codsi Wadareed u gudbin karaa Wasaaradda ay khuseeyso waana in ay warbixin ugu soo gudbisaa Golaha (14) afar iyo toban maalmood gudahood.
6. Codsi Wadareedka loo gudbiyay Guddi waa in ay uga soo shaqeeyaan (14) afar iyo toban maalmood gudahood.
7. Haddii Sanatar soo jeediyo soo jeedin ku aadan in codsi wadareedka la celiyo sababo la xiriira in uusan u qorneen si aan habooneen ixtiraamna laheyn, ama sabab kale, Haddii la taageero soo jeedinta Lana aqbalo, Codsi Wadareedka dib ayaa loo celinayaa.
8. Ka dib Goluhu markii uu ka doodo codsi wadareedka go'aana ka gaaro waxaa go'aanka Golaha loo gudbinayaa soo gudbiyayaasha Codsi Wadareedka iyadoo loo marsiinayo Xafiiska Guddoomiyaha.
9. Xoghaya Guud waa inuu sanatarka ku caawiyaa qabya qoridda codsi wadareedka haddii uu ka dalbado.

## QODOBKA 88-AAD: SOO BANDHIGIDDA QORAALADA (LAYING OF PAPERS)

Waxaa qoraal u soo bandhigi kara Golaha Sanatar.

1. Nuqulka qoraalka loo soo bandhigayo Golaha waa in loo qeeybiyaa Sanatarada.
2. Marka Xoghaya Guud shaaciyo soo bandhigid qoraal waa in Golaha loo soo bandhigaa.
3. Haddii shaqsiga soo bandhigaya qoraalka codsado inuu faafaahin kooban ka sameeyo waa loo ogalaanayaa.
4. Warqadda loo soo bandhigo Golaha waxaa loo diiwaan galinayaa in la soo bandhigay.
5.

## QODOBKA 89-AAD: SOO BANDHIGADDA WAR BIXINTA DIBADDA EE WUFUUDDA BAARLAMAANKA.

1. Madaxa Wafdiga Baarlamaanka ama Sanatar ku hadlaya magaciisa waa in ay Afar iyo toban Fadhi gudahood oo ka bilaabaneysa maalinta wafdiga dib ugu soo noqdo Dalka u soo bandhigaan Golaha warbixinta hawlaha Wafdiga.
2. Ka dib soo bandhigidda war bixinta si waafaqsan Faqradda 1aad, Guddomiyuhu waxaa uu cayimi karaa waqtiga dooda.

## QODOBKA 90-AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALAD DEG DEG AH.

Qodobada soo socda ayaa ku dabaqmaya ku dhawaaqista Xaalad deg deg ah:

1. Marka uu Madaxweynuhu adeegsanayo awoodiisa ku dhawaaqidda Xalaad deg deg ah, waa in uu hordhigaa Fadhiga wadajirka Baarlamaanka si ay qaraar ugu dhaqangeliyaan.
2. Sababeynta Xaalad deg deg ah ee laga doodayo waa in ay ku saleysantahay xaalad culus oo ka dhalata Dagaal, Weerar dalka lagu soo qaaday, Kacdoon, Nidaam darro ama Musiibo Dabiici ah ama arrin kale oo deg deg ah oo ba'an.
3. Qaraarka soo jeedinta waa in u cadeeyaa xeeyndaabka uu ku dabaqmayo Xaaladda deg deg ah (Dalka oo dhan ama Qeyb ka mid ah).
4. Qaraarka soo jeedinta waa in uu cadeeyaa heerka awoodda oo ay Dowladu isticmaleyso xiliga Xaaladda deg deg ah.
5. Baarlamaanka Federaalka waa in uu yeeshaa Fadhi wadajir ah uu uga doodayo Xaaladda deg deg ah, Kow iyo Labaatan maaalmood (21) gudahood oo ka bilaabaneysa maalinta uu Madaxweynuhu ku dhawaaqay Xaaladda deg deg ah.
6. Qodabada la xiriira hab raaca Fadhiga wadajirka ah ayaa ku dabaqmaya Fadhiga ansixinta iyo dheereynta Xaaladda deg deg ah.

## QODOBKA 91-AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALAD DAGAAL.

Si waafaqsan Qodabka 90 iyo 71(f) ee Dastuurka hanaanka ku dhawaaqidda xaaladda deg deg ah ayaa ku dabaqmeysa ku dhawaaqista xaaladda dagaal iyadoo la sameenayo toosin hadba intii loo baahdo sida:

b) Haddii ayna suuragal aheyn in Baarlamaanka laga dalbo in uu ansixiyo xaaladda dagaal inta uusan Madaxweynuhu ku dhawaaqin, Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqi kara xaaladda dagaal ka dibna todobaatan iyo Laba Saac (72) gudahood uga dalbadaa Baarlamaanka ansixinta Xaaladda Dagaal.

t) Haddii xaaaladda dagaal lagu dhawaaqo iyada uu Baarlamaanku fasax ku maqanyahay Guddomiyaha Golaha Aqalka sare ayaa si dhaqsi ah isugu yeeraya Baarlamaanka Fadhi aan caadi aheyn afartan iyo siddeed saac (48) gudahood kadib ku dhawaaqidda.

j) Madaxweynaha oo haysta ansixinta Baarlamaanka wuxuu ka laaban karaa ku dhawaaqidii Xaalad Dagaal.

## QODOBKA 92-AAD: MAAMUUSKA MADAXWEYNAHA MARKI UU GOLAHA JOOGO.

1. Waa in uu jiraa Kursi u gaar ah Madaxweynaha
2. Waa in la aamusaa loona istaagaa Madaxweynaha marki uu soo galayo ama uu ka baxayo Golaha.
3. Madaxweynaha waxaa Golaha u soo raaci kara Sarkaal sharafeedkiisa ( Aide-de camp)
4. Markuu Madaxweynuhu fadhiyo Kursigiisa gaar ah waa inuu :

   b. Jeedinayaa Qudbadiisa iyadoo loo dhageysanayo si aamusnaan ku jirta lagana keenin wax su'aal ama faalo ah.

   t. Ka qeyb qaadan howlaha Golaha sinaba.

## QODOBKA 93: REEBANAANTA HOOS U DHIGISTA IYO XADDIDAADA AWOODDA XEER-HOOSAADKA GOLAHA

Ma jiro Heshiis ama xeer dhaqan oo xadidi kara ama wax u dhimi kara qodobada xeer-hoosaadkan haddii uusan ka hor imaanaynin shareecada islaamka iyo Dastuurka Dalka.

## QODOBKA 94-AAD: XEER HOOSAADKA AQALKA SARE

1. Xeer-hooosaadka Aqalka Sare waxuu dhaqan galayaa kadib ansixinta cod aqlabiyad (50 %+ 1) ee xubnaha Golaha.
2. Xeer-hoosaadka waxaa wax ka badal lagu sameyn karaa ka dib markii ay Soo jeedin (motion) soo jeeediyaan, Guddiga Xeer-Hoosaadka Anshaxa iyo Xasaanada ayna ku taageeraan cod aqlabiyad ah (5%0+1) tirada guud xubnaha Golaha.
3. Laalista qodobada xeer-hoosaadka waxaa go'aamin kara aqlabiyad sadax dalool labo(2/3) ee Aqalka Sare, haddii aysan ka hor imaneyn faritaanada Dastuurka.

## QODOBKA 95: XIL WAREEJINTA XAFIISKA GUDDOOMIYAHA IYO ARRIMIHA LA XIRIIRA.

**1. Howlaha Guddiga**

b. Guddi walba waa in u diyaariyaa wax qabadka howlihiisa laga soo bilaabo Kalfadhiga Koowaad inta lagu gudajiro Kalfadhiga ugu danbeeyo.

t. Howlaha la tilmaamayo waxaa ka mid ah:

- Sharciyada Guddigu ka shaqeeyay.
- Dhammaan warbixinada Guddigu u gudbiyay Golaha si looga dooddo.
- Soo jeedinnada iyo Su'aalaha Guddigu soo jeediyay.
- Howlaha Kormeerka Guddigu sameeyay.
- Warbixin kooban oo ah go'aanada iyo talooyinka Golaha ee ku aadan Warbixinta Guddiga.
- Caqabadaha iyo dhibaatooyinka soo wajahay Guddiga ee ku aadan gudashada waajibaadkiisa.
- Go'aanada Xukuumada ee ku aadan tala bixinta Guddiga.
- Howlaha qabyada ee Guddiga iyo asbaababaha loo qaban waayay.
- Talooyinka Guddiga imaandoona.

1. Xoghayaha Guud waa in uu qeybiyaa warbixinada dhammaan Xubanaha ugu yaraan ka hor Afar iyo Toban (14) maalmood muddada Xil heynta Golaha.
2. Guddoomiyaha Guddi waliba waa in uu u soo jeediyaa Golaha Warbixinta Guddigiisa Isbuuca ugu danbeeya ee muddada Xil heynta Golaha si loo ansixiyo.
3. Xoghayaha Guud waa in uu ka diyaariyaa afar Nuqul dhammaan Warbixinada Guddiyada ee Guluhu ansixiyay.
4. Xaflada xil wareejinta Xafiiiska Guddomiyaha, Guddomiyaha Xafiiska ka tagaya ayaa Nuqul Warbixinta ah ku wareejinayaa Guddomiyaha Xilka qabanaya.
5. Guddoomiyaha Guddi waliba ee xilka la wareegaya waxaa la siinayaa Nuqulka Warbixinta Guddiga uu Guddomiyaha u noqonaya.

**2. Fadhiga Guud (Plenary)**

Xoghayaha Guud waa in uu ka diyaariyaa Nuqulo ka kooban arrimaha soo socda Fadhiga Guud ee Golaha

- ✓ Qaraarada Guluhu ansixiyay saxiixaana Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud
- ✓ Dhammaan hadal jeedinada Madaxweynaha ee Golaha.
- ✓ Liiska Sharciyada la hor keenay Golaha mudada Xil heyntiisa.
- ✓ Liiska Warbixinada Guddiyada Golaha u soo gudbiyeen.
- ✓ Liiska warbixinada Wufuuda Dibadda u soo gudbiyeen Golaha.
- ✓ Liiska su'aalaha (faafaahinada Su'aalaha) ee la hor keenay Golaha.
- ✓ Liiska Codsi wadareedyada (Petition) loo soo bandhigay Golaha.
- ✓ Liiska qoraalada (Papers) ee la hor keenay Golaha
- ✓ Liiska soo jeedinada Golaha la hor keenay

Xoghayaha Guud waa in uu ka diyaariyaa Afar Nuqul dokumuntiyada lagu tilmaamay Faqrada 9aad (a), oo mid ka mid ahi Guddomiyaha Xilka ka dagaya ku wareejinayo Guddomiyaha xilka qabanaya.

**3. Xafiiska Guddomiyaha**

- Isbuuca ugu danbeeya ee mudada xil heynta Golaha, mid ka mid sanatarada waa in uu soo jeediyaa, soo jeedin lagu sharfayo Guddomiyaha Golaha.
- Doodda waxaa Shir Guddoominaya mid ka mid ah Ku-xigeenada Guddomiyaha.
- Dooddu waxay ku saabsanaaneysaa wax qabadka, caqabadaha uu wajahay Xafiiska Guddoomiyaha ee la xiriira Maamulka iyo Sharci dejinta.
- Guddoomiyaha ayaa hadlaya gabagabada soo jeedinta.
- Xoghayaha Guud ayaa ka sameynaya Keyd howsha soo jeedinta kana diyaarinaya Qaraar gabagabada soo jeedinta.
- Keydka iyo Qaraarka waxaa ay qayb ka noqonayaan dukumintiyada loo gudbinayo Guddoomiyaha xilka la wareegaya.

**4. Warbixin kooban**

1. Guddomiyuhu waa in uu warbixin yar oo kooban ka bixiyaa isticmaalka qalabka:
2. Isticmaalka qalabka Golaha marki uu xiligiisa dhamaado:

1. Sanatarada xiligooda dhammaaday waxaa ay sii isticmaali karaan qalabka iyo adeegyada Golaha inta aanu Golahu cusub Fadhigiisa cusub yeelan.
2. Mushaaraadka iyo gunooyinka sanatarada waxaa uu ku egyahay dhamaadka xiliga Golaha.
3. Sanatarka xilkiisu sii dhamaanayo waxaa uu dalban karaa qarashaadka hal Safar ee uu ugu noqonaayo deegaan doorashadiisa.
4. Baarlamaanku wuu u furanyahay Sanatarada xiligooda dhammaaday mar walba ay u baahdaan adeeg.
5. Sanatarada xiligooda sii dhamaanayo looma ogala in ay Golaha iyo Dhismayaasha kale ee Baarlamaanka ku soo bandhigaan astaamaha xisbiyadooda iyo barabagaanda xayeysiis ee la xiriirta Doorashooyinka.
6. Sanatarada xiligooda sii dhammaanayo waa in ay soo celiyaan dhammaan kombiyuutarada iyo qalabka shaqo ay heystaan
7. Sanatarada xiligooda sii dhammaanayo waxay ku aqrisan karaa Maktabada wargeysyada iyo aqbaarta daabacan ama elaktaroonikada ah.
8. Ma jirayo wax amaah oo Sanatarada xilkooda sii dhammaanaya u heysanayaan dhammaan Dukumintiyada Golaha, waana in dib loo soo celiyaa dhammaan Dukumintiyada amaahda loo qaatay ugu danbeyn lixda maqribnimo (6:00pm) ee maalinta kala dirista Golaha.

## QODOBKA 96AAD: MAAMULKA GOLAHA AQALKA SARE

1. Shaqaalaha Golaha Aqalka Sare waxay ka mid yihin shaqaalaha dowlada isla markaasina yihin xubin muhim ka ah shaqaalaha rayidka ee dawladda.
   Toos waxaa u shaqaleysta Golaha hadba sida baahidiisa ay tahay, iyo shurudaha loogu tala galay sida uu cadeeyo Gudiga Arrimaha Golaha.
2. Xilalka iyo isku dubbaridka shaqaalaha Golaha waxaa lagu hagaya Xeer maamuleed oo gooni ah sida uu u soo jeediyo Guddiga Arrimaha Golaha uuna u ansixiyo Golaha Aqalka Sare.
3. Shaqalaha Golaha waxaa ay hoos imanayaan Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare kaas oo kormeeraya, qiimaynaya shaqaadooda, amarkiisana ay ku shaqeynayaan. Xoghayaha ay ka mid tahay howshiisha arrimaha ku saabsan maqaamkooda iyo marxaladooda shaqo.
4. Qiimaynta shaqada, dallacsiinta, tilaabooyinka anshaxa iyo kala wareejinta shaqalaha waa in ay waafaqsanaadaan xeer Xaamuleedka Golaha si waafaqsan xeerarka shaqaalaha rayidka ah ee dowlada.

## QODOBKA 97-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA AQALKA SARE

1. Xeer-hooosaadka Golaha Aqalka Sare waxuu dhaqan galayaa kadib ansixinta cod aqlabiyad oo ah (50%+1) ee xubnaha Golaha uuna saxiixay Guddomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo ku Xigeenadiisa.
2. Xeer-hoosaadka waxaa wax ka badal lagu sameyn karaa kadib markii ay soo jeedin soo gudbiyaan ugu yaraan 10 Sanatar , ayna ku taageeraan cod aqlabiyad (50%+1) ah tirada guud xubnaha Golaha.
3. Laalista qodobada xeer hoosaadka waxaa go'aamin kara aqlabiyad sadax dalool labo(2/3) ee Golaha Aqalka sare, haddii aysan ka hor imaneyn faritaanada Dastuurka
4. Xeer-hoosaadkan wuxuu leeyahay awood Sharci.

## QODOBKA 98: LAALIS

1. Qodob kasta oo ka tirsan Xeer-hoosaadkan ee la xirriira hawlahaan ama hab-socodka fadhiyada Golaha ama Guddi ka mid ah ee Golahan, waxaa lagu laali karaa qaraar ka soo baxa isla Golaha.
2. Laalis kasta oo ku saabsan qodob waxay ku koobnaanaysaa oo keliya ujeedada tooska ah oo laalista la ansixiyay ku beegan Qodobkan.

## JADWALKA (A): DHAAR

***"WAXAAN KU DHAARANAYAA MAGACA ILAAHAY IN AAN XILKAYGA U GUTO SI DAACAD AH OO AY KU JIRTO DANTA DALKA, DADKA IYO DIINTA DHOWRANA DASTUURKA IYO SHURUUCDA KALE EE DALKA U YAAL"***

**JADWALKA (B): OGEYSIISKA TARTANKA DOORASHADA MADAXWAYNAHA SOOMAALIYA**

Anigoo ah……… ….Sarkaalka idman ee doorashada Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaan halkaan ka ogeysiinayaa in:

- Murashaxa ama ciddii wakiil ka ah u soo gudbiyaan warqadaha soo jeedinta Gudoomiyaha Guddiga Doorashada Madaxweynaha saacadaha 08:00 subaxnimo ilaa 04:00 galabnimo ugu dambayn. maalinta………….taariikhda………… 20..
- Warqadaha soo jeedinta waa in ay wehlisaa warqada ku dhawaaqida Murashaxnimo oo uu ku qirayo inuu Murashaxu yahay; Soomaali, Muslim, ka yarayn 40 sanno, Maskaxdiisu fiyowdahay, leeyahay aqoon ama waaya arag nimo iyo in aan Maxkamadi dembi culus ku xukumin
- Foomamka warqadaha Soo jeedinta waxaa laga heli karaa xafiiska gudoomiyaha Guddiga Doorashada ee labada Gole saacadaha 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo maalmaha shaqada.
- Maalinta Doorashada, codayntu waxay ka dhacaysaa ……………………(Goobta) taariikhda………saacadaha u dhaxeeya …………… ilaa …………..

Magaca………………………………
Saxiixa………………………
Taariikhda………………………………..
Jagada……………………

## JADWALKA (C): Warqada Soo jeedinta

**Doorashada Madaxwaynaha Soomaaliya**

Waxaan halkaan ka Soo jeedinaynaa:
…………………………………………………………………………………………………………
……

(Magaca Murashaxa oo dhamaystiran iyo ciwaamkiisa)
Inuu noqdo Murashaxa Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Waxaan kaloo halkan ka cadaynaynaa in aanu nahay Xubno ka tirsan Baarlamaanka federaalka sida lagu sheegay qodobka 89aad farqadiisa 3-aad ee dastuurka waxaana ku taageeraynaa saxiixeena Soo jeedintaan:

| TIRADA | MAGACA SENATORADA HAL DOWLAD GOBOLEED | SAXIIXA |
|---|---|---|
| 1 | | |
| 2 | | |
| 3 | | |
| 4 | | |

Waxaan waafaqsanahay Soo jeedintaan
…………………………

*Saxiixa Murashaxa*

## JADWALKA (D): QORAALKA CADDAYNTA MURASHAXA

Anigoo ah ……………………………………………………………………………waxaan halkaan ka caddaynayaa in

1. Aan Muwaadin Soomaali ahay

2. Aan Muslim ahay

3. Aan 40 jir ka yarayn;

4. Maskaxdeydu Fiyowdahay

5. Leeyahay Aqoonta iyo khibradaha ku cad Taariikh Nololeedka (CV) ee ku lifaaqan warqadaan.

6. Aysan Maxkamad igu xukumin Dembi Culus.

7. Aysan jirin wax iga reebaya in aan u tartamo doorashada

Waxaan caddaynayaa macluumaadka aan ku soo gudbiyay halkan ay run yihiin wixii aan ka been sheegayna aan anigu Mas'uul ka ahay.
Anigoo Saxeexay oggolaadayna Maanta oo Taariikhdu tahay …....Bisha…..ee Sannadka……
………………………………………
Saxiixa Musharaxa Madaxweyne

## JADWALKA (E): WARQADDA QABASHADA (RECEIPT) SOO JEEDINTA (WAXAA LA SIINAYAA QOFKA SOO GUDBIYA WARQADA SOO JEEDINTA)

Tixraaca warqada soojeedinta Nambar……

Warqada Soo jeedinta ee ………………………….., oo ah Murashaxa u tartamaya Xafiiska Madaxwaynaha Soomaaliya, waxay xafiiskeyga soo gaartay Saacaddu markay ahayd…………. Maalinta……… Bisha……….ee Sannadka….
Waxaana soo gudbiyay Murashaxa/Wakiilkiisa/Soo jeediyaha…………………… ……….
Iyadoo ay la socdaan dukumintiyada hoos ku qoran

1. …….

2. ………

3. …….

4. ……

5. ………

*Taariikh…………………*

…………………………..

Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Madaxweynaha

## JADWALKA (F): GO'AAN KA CELINTA WARQADA SOO JEEDINTA

Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Madaxweynaha markuu baaray darsayna warqada soo jeedinta ……………………… ee loo soo gudbiyay Taariikh…..Maalinta-----Sanadka, wuxuu go'aansaday sida soo socota.
Go'aanka…………………………………………………………………………………………….
Sababaha:

1. ………………………
2. ………………………
3. ……………………...
4. ………………………
5. ………………………

Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Madaxweynaha

## JADWALKA (G): WARQADA CODAYNTA

**FG: Hal Musharax keliya u Codee (1)**

| Lr | Magaca Musharaxa | Ku Calaamadee (√) |
|---|---|---|
| 1 | | |
| 2 | | |
| 3 | | |
| 4 | | |
| 5 | | |
| 6 | | |
| 7 | | |
| 8 | | |
| 9 | | |

Maalinta la dhaariyay xubanaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya: 27 December, 2016
Maalinta la furay Golaha Aqalka Sare Kalfadhiga 1-aad la furay: 5th January, 2017
Maalinta la doortay Guddoonka Aqalka Sare: 22nd January, 2017